Ku dhaqan Xafiis D.


# FAAFINTA RASMIGAAH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 12aad Muqdisho, 07 April 2025 Lr. 1**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**


## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo.Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee WasaaraddaMaaliyadda.

# KOBNIIN


**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**


## Bilaha

# JAN - March

# 2025

**Tariikh: 15/02/2025**

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr 174**

**XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA NIDAAMKA XUKUUMADDA .**

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
BIXID
17 FEB 2025
EXIT
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 97aad farqadaha 1aad iyo 2aad; Qodobka 99aad farqadaha (a), (b), (e), (f); iyo Qodobka 100aad farqadaha (a) (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Sharciga Nidaamka Xukuumadda (Sharci Lr. 14) ee soo baxay 3 Juun 1962; iyo Qaraarka Golaha Shacabka ee tirsigiisu yahay GSH/11/03/22 ee soo baxay 7 Agoosto 2022.

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.06.109.02.25** ee **13/02/2025,** kuna saabsan ansixinta **"Xeer-nidaamiyaha Sharciga Nidaamka Xukuumadda** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimadda xeer-nidaamiyahan u leeyahay dowlad-diska iyo horumarinta shaqada Dowladda;

**Wuxuu Meel-mariyey:**

**Qodobka 1aad**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.06.109.02.25** ee **13/02/2025,** kuna saabsan ansixinta "**Xeer-nidaamiyaha Sharciga Nidaamka Xukuumadda"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

## Qodobka 2aad

**Oggolaansho iyo Hirgalin Xeer**

Waxaa xeer-nidaamiyahan hirgalinaya, meelmarinayana Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jahmuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 3aad

**Dhaqangal Go'aan Gole**

Xeer-nidaamiyaha Sharciga Nidaamka Xukuumadda waxaa uu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Han-006-2025
TAARIIKH : 24-02-2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA**

# *XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA NIDAAMKA XUKUUMADDA*

## TUSMO


**CUTUBKA KOOWAAD: QODOBBO GUUD** **5**
QODOBKA 1[AAD]: MAGACA XEER-NIDAAMIYAHA 5
QODOBKA 2[AAD]: UJEEDDADA XEER-NIDAAMIYAHA 5
QODOBKA 3[AAD]: EREY BIXIN 6
QODOBKA 4[AAD]: MABAADI'DA GUUD EE HOWLAHA XUKUUMADDA 6
QODOBKA 5[AAD]: XIL-GUDASHADA XUKUUMADDA JFS 7
**CUTUBKA LABAAD: GOLAHA WASIIRRADA IYO AWOODAHOODA** **7**
QODOBKA 6[AAD]: GOLAHA WASIIRADA 7
QODOBKA 7[AAD]: AWOODAHA GOLAHA WASIIRAA 7
QODOBKA 8[AAD]: GUDDI-HOOSAADYADA GOLAHA WASIIRADA 8
**CUTUBKA SADDEXAAD: XAFIISKA RA'IISUL-WASAARAHA** **9**
QODOBKA 9[AAD]: XAFIISKA RA'IISUL-WASAARAHA 9
QODOBKA 10[AAD]: XILKA XOGHAYAHA JOOGTADA AH 10
CUTUBKA AFARAAD: KULAMADA GOLAHA WASIIRADA 11
QODOBKA 11[AAD]: AJENDAA 11
QODOBKA 12[AAD]: GO'AANKA ISUGU YEERISTA KULAMADA 11
QODOBKA 13[AAD]: KULAMADA AAN CAADIGA AHAYN 12
QODOBKA 14[AAD]: GOOBTA KULANKA 12
QODOBKA 15[AAD]: WAKHTIA KULAMADA 12
QODOBKA 16[AAD]: GUNTANKA KULAMADA 12
QODOBKA 17[AAD]: HABKA DOODDA 13
QODOBKA 18[AAD]: JOOJINTA AMA HAKINTA KULAMADA 13
**CUTUBKA SHANAAD: NIDAAMKA KULAMADA GOLAHA WASIIRADA** **13**
QODOBKA 19[AAD]: ILAALINTA WAKHTGA KULAMADA 13
QODOBKA 20[AAD]: FADHIGA KULAMADA 13
QODOBKA 21[AAD]: KA TAGISTA KULAMADA 14
QODOBKA 22[AAD]: NIDAAMKA 14
QODOBKA 23[AAD]: DIIWAANKA HADL-QORAALLADA IYO GO'AANNADA 14
**CUTUBKA LIXAAD: WASAARADAHA XUKUUMADDA JFS** **15**
QODOBKA 24[AAD]: WASAARADAHA 15
QODOBKA 25[AAD]: WASAARADDA CADAALADDA IYO ARRIMAHA DASTUURKA 16
QODOBKA 26[AAD]: WASAARADDA AWQAAFTA IYO ARRIMAHA ISLAAMKA 18
QODOBKA 27[AAD]: WASAARADDA ARR. DIBEDDA IYO ISKAASHIGA CAALAMIGA 19

QODOBKA 28AAD: WASAARADDA GAASHAANDHIGGA 20
QODOBKA 29AAD: WASAARADDA ARR.GUAHA F. IYO DIB-U-HESHIISIINTA 21
QODOBKA 30AAD: WASAARADDA AMNIGA GUDAHA 22
QODOBKA 31AAD: WASAARADDA MAALIYADDA 23
QODOBKA 32AAD: WASAARADDA QORSHEYNTA, MAALGASHIGA & H. DHAQAALAHA 24
QODOBKA 33AAD: WASAARADDA WAXBARASHADA, HIDDAHA IYO TACLIINTA SARE 24
QODOBKA 34AAD: WASAARADDA CAAFIMAADKA IYO DARYEELKA BULSHADA 25
QODOBKA 35AAD: WASAARADDA SHAQADA IYO ARRIMAHA BULSHADA 26
QODOBKA 36AAD: WASAARADDA QOYSKA IYO XUQUUQUL INSAANKA 27
QODOBKA 37AAD: WASAARADDA BEERAHA IYO WARAABKA 28
QODOBKA 38AAD: WASAARADDA KALLUUMEYSIGA IYO DH.BULUUGGA 29
QODOBKA 39AAD: WASAARADDA XANNAANADA XOOLAHA, DH. IYO DAAQA 30
QODOBKA 40AAD: WASAARADDA BATROOLKA IYO MACDANTA 31
QODOBKA 41AAD: WASAARADDA GANACSIGA IYO WARSHADAHA 31
QODOBKA 42AAD: WASAARADDA DEKEDAHA IYO GAADIIDKA BADDA 32
QODOBKA 43AAD: WASAARADDA GAADIIDKA IYO DUULISTA HAWADA RAYIDKA 33
QODOBKA 44AAD: WASAARADDA TAMARTA IYO KHEYRAADKA BIYAHA 34
QODOBKA 45AAD: WASAARADDA ISGAARSIINTA IYO TEKNOOLOOJIYADDA 35
QODOBKA 46AAD: WASAARADDA DEEGAANKA IYO ISBEDDELKA CIMILADA 36
QODOBKA 47AAD: WASAARADDA WARFAAFINTA, DHAQANKA IYO DALXIISKA 37
QODOBKA 48AAD: WASAARADDA HOWLAHA GUUD IYO GURIYEYNTA 37
QODOBKA 59AAD: WASAARADDA DHALLINYARADA IYO CIYAARAHA 38
QODOBKA 50AAD: WAAJIBKA WADASHAQEYNTA WASAARADAHA 39
**CUTUBKA TODOBAAD: NIDAAMKA MAAMULKA GUUD 40**
QODOBKA 51AAD: SHAQADA WASIIRKA 40
QODOBKA 52AAD: SHAQADA WASIIRU-DOWLAHA IYO WASIIR KU-XIGEENKA 41
QODOBKA 53AAD: SHAQADA AGAASIMAHA GUUD IYO HOGHEYYAASHA JOOGTADA 41
QODOBKA 54AAD: MAAREYNTA SHAQAALAHA DOWLADDA 43
QODOBKA 55AAD: QAAB-DHISMEEDKA HAY'ADAHA DOWLADDA 43
QODOBKA 56AAD: QORSHEYAASHA HAY'ADAHA DOWLADDA 45
**CUTUBKA SIDDEEDAAD: HANNAANKA ISTICMAALKA AWOODDA FULINEED 46**
QODOBKA 57AAD: AWOODDA SOO SAARISTA XEER-NIDAAMIYEYAASHA 46
QODOBKA 58AAD: DEKREETOOYINKA AMA XEERARKA MAAMUL 46
QODOBKA 59AAD: GELLIDDA HESHIISYADA 46
QODOBKA 60AAD: GO'AANNADA MAAMUL 47

**CUTUBKA SAGAALAAD: KAABEYAASHA XUKUUMADDA** **48**
QODOBKA 61[AAD]: WADASHAQEYNTYA XUKUUMADDA IYO KAABEYAASHA 48
QODOBKA 62[AAD]: WADASHAQEYNTYA WASAARADAHA H.FEDERAL IYO H.D.GOBOLEED 48
QODOBKA 63[AAD]: HEERARKA MADAXBANNAANIDA 48
**CUTUBKA TOBANAAD: QODOBBO QUBANE AH** **49**
QODOBKA 64[AAD]: DIB-U-EEGISTA IYO WAX-KA BEDDELKA 49
QODOBKA 65[AAD]: DHAQAN-GELINTA IYO BAABI'INTA 49

## CUTUBKA KOWAAD
## QODOBBO GUUD

### *QODOBKA 1^AAD^*
### *MAGACA XEER-NIDAAMIYAHA*

Xeer-nidaamiyahaan waxaa lagu magacaabayaa **"Xeer-nidaamiyaha Sharciga Nidaamka Xukuumadda."**

### *QODOBKA 2^AAD^*
### *UJEEDDADA XEER-NIDAAMIYAHA*

Ujeeddada xeer-nidaamiyahaan waa:

a) Dhaqangelinta iyo faahfaahinta mabaadii'da iyo ujeeddooyinka uu xambaarsan yahay Sharci Lr. 14 ee soo baxay 3 June 1962 ee Nidaamka Xukuumadda ee Jamhuuriyaddii Soomaaliya (1962 – 1967kii), iyo qaraarka Golaha Shacabka ee tirsigiisu yahay Tix: GSH/11/03/22 ee ku taariikhaysan 07 Agoosto 2022 laguna ansixiyay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyo barnaamijkeeda;

b) Kaabista mabaadii'da iyo ujeeddooyinka ku xusan qodobbada Sharci Lr. 14 ee soo baxay 3 June 1962 iyo wax-ka-beddelkii lagu sameeyay iyo dikreetooyinkii madaxweyne iyada oo la waafajinaayo dhaqanka dastuuriga ah ee taabbagalay seddexdii muddo-xileed ee ugu dambeyeey iyo mabaadii'da aasaasiga ah si waafaqsan Qodobka 139^aad^ ee Dastuurka oo xeerinaya sii socoshada xeerarka;

c) In Xukuumaddu yeelato hannaan sharci ah oo faahfaahsan kaas oo ay ku gudan karto waajibaadkeeda dastuuriga ah;

d) In Wasaaradaha loo kala caddeeyo waajibaadkooda, iyada oo la xoojinayo wada-shaqaynta, iskaashiga iyo xallinta khilaafka;

e) In nidaamka maamulka guud la waafajiyo halbeegyada casriga ah iyada oo la kala qeexayo shaqada Wasiirka iyo midda Agaasimaha Guud;

f) In Wasaaraduhu iyo hay'adaha kaleba ay yeeshaan qaab-dhismeed midaysan iyo qorshe istiraatiiji ah shan sano ah;

g) In la nidaamiyo xiriirka ka dhexeeya Wasaaradaha iyo hay'adaha hannaan ahaan hoos yimaadda;

h) In la caddeeyo sida awoodda fulineed loo isticmaali karo, iyada oo la faahfaahinayo habraacyada dikreetooyinka/xeerarka maamul, xeer-nidaamiyeyaasha iyo habraacyada go'aannada maamul.

## *QODOBKA 3AAD*
## *EREYBIXIN*

1. Haddii aan si kale loogu dhex-sheegin xeerar kale, ereyada soo socda waxaa loola jeedaa:

   a) **Xukuumadda:** Xukuumadda Federaalka Soomaaliya;

   b) **Kaabeyaasha Xukuumadda:** Hay'adaha madaxbannaan, wakaaladaha, iyo xafiisyada kaabaya shaqada Xukuumadda;

   c) **Dikreetooyinka ama Xeerarka Maamul:** waxaa loola jeedaa xeerarka fulineed oo ay soo saareyso laanta fulinta, iyada oo isticmaaleysa awooddeeda maamul;

   d) **Go'aannada maamul:** waxaa loola jeeda go'aannada ay gaarayaan wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee laanta fulinta, iyaga oo isticmaalaya awoodaha lagu siiyay shuruucda, xeer-nidaamiyeyaasha, siyaasadaha iyo qodobbada kale ee leh awood sharci;

   e) **Dastuurka:** waxaa loola jeeda Dastuurka KMG ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya lana ansixiyay 1da Agoosto 2012;

   f) **Dikreeto xeereed:** waxaa loola jeedaa qodobbo leh awood xeereed oo ay laanta fulintu u soo saarto si KMG ah iyada oo muddo gaaban gudaheed ku horgeyneysa Baarlamaanka Federaalka si uu xeer ugu rogo;

   g) **Dikreeto xeer-dejineed:** waxaa loola jeedaa sharci dhammeystiran oo ay soo saarto laanta fulinta iyada oo isticmaaleysa awood xeer dejineed oo uu Baarlamaanku u wakiishay.

## *QODOBKA 4AAD*
## *MABAADII'DA GUUD EE HOWLAHA XUKUUMADDA*

1. Xukuumadda Federaalka ahi waxa ay ku shaqeyneysaa mabaadii'da dastuuriga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyada oo dhowraysa kala soocnaanta awoodaha dastuuriga ah iyo xuquuqda aadanaha ee Dastuurku dammaanad-qaaday.

2. Shacabka Soomaaliyeed waxay xaq u leeyihiin in ay talooyin ku biiriyaan dejinta siyaasadaha Qaranka ee khuseeya arrimaha gudaha iyo dibedda, dhaqaalaha, caddaaladda, maamulka guud, amniga iyo arrimaha bulshada si toos ah ama iyaga oo u soo maraya ururadooda bulsho.

3. Xukuumaddu waxa ay u isticmaalaysaa awooddeeda fulineed inta uu sharcigu u oggol yahay, waana in go'aannada ka soo baxa ay waafaqsanaadaan Dastuurka iyo Shuruucda kale ee Dalka.

### *QODOBKA 5AAD*
### *XIL-GUDASHADA XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA*

Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxa ay u gudanaysaa waajibaadkeeda ku aaddan siyaasadda arrimaha gudaha iyo dibedda, caddaaladda, dhaqaalaha, amniga, horumarinta Qaranka iyo arrimaha bulshada, si waafaqsan xeer-nidaamiyahaan maamul iyo Xeerarka kale ee Dalka, waxaana ku hoggaaminaya Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.

## CUTUBKA LABAAD
## GOLAHA WASIIRADA IYO AWOODAHOODA

### *QODOBKA 6AAD*
### *GOLAHA WASIIRADA*

1. Golaha Wasiirada ee xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxa uu ka kooban yahay Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Ra'iisul-wasaare Ku-xigeenka/Ku-xigeenno, wasiirrada wasaaradaha Wasiiru-dowleyaasha iyo Wasiir ku-xigeennada, si waafaqan Qodobka 97aad (2) ee Dastuurka.

2. Wasiiru-dowleyaasha iyo wasiir-ku-xigeennada waxa ay ka qeybgelayaan kulamada Golaha Wasiirada iyaga oo aan cod laheyn. Haddii wasiiru-dowlaha ama wasiir-ku-xigeenku uu metelayo wasiirka waa uu codeynayaa.

### *QODOBKA 7AAD*
### *AWOODAHA GOLAHA WASIIRADA*

1. Iyada oo aan waxba loo dhimaynin Qodobka 99aad ee Dastuurka, Golaha Wasiiradu waxa ay xilkooda u gudanayaan sida soo socota:

   **a) Awoodaha Guud:**

      i. Diyaarinta iyo meelmarinta siyaasadaha iyo hindise-sharciyeedyada ay Xukuumaddu curiso, iyaga oo ka codsan kara Baarlamaanka Federaalka in uu dib ugu soo celiyo hindise-sharciyeedyo hore loogu gudbiyay;

ii. Diyaarinta iyo meelmarinta dikreetooyinka xeereed, dikreetooyinka sharci-dejineed ee Baarlamaanka Federaalku u igmaday, iyo xeer-nidaamiyeyaasha loogu xilsaaray Dastuurka ama shuruucda kale ee dalka;

iii. Meelmarinta heshiisyada caalamiga ah iyo siyaasadda arrimaha dibedda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

iv. Arrimaha kale ee loogu xilsaaray Dastuurka, shuruucda kale ee dalka iyo xeer-nidaamiyeyaasha.

**b) Awoodaha Maaliyadda Guud:**

i. Meelmarinta miisaaniyadda Qaranka, ku-noqoshadeeda, iyo xisaab-xirkeeda, iyaga oo u gudbinaya Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, si waafaqsan Shuruucda khuseeysa maamulka maaliyadda guud ee dalka.

ii. Arrimaha kale ee sharcigu u xilsaaray ama ka baxsan awoodaha Wasiirka Maaliyadda iyo xafiisyada kale ee dowladda.

**c) Awoodaha Arrimaha Shaqaalaha:**

i. Soo jeedinta magacaabista iyo xil-ka-qaadista saraakiisha sare ee lagu sheegay Dastuurka ama shuruucda kale ee dalka si waafaqsan Qodobka 117aad ee Dastuurka iyo Shuruucda kale ee Dalka;

ii. Soo jeedinta magacaabista xubnaha Guddiyada Madaxabannaan iyo saraakiisha kale ee sharcigu farayo, iyaga oo u gudbinaya Baarlamaanka Federaalka;

iii. Arrimaha kale ee loogu xilsaaray shuruucda shaqaalaha rayidka ee Dowladda iyo shuruucda hay'adaha amniga Qaranka.

## QODOBKA 8AAD
## GUDDI-HOOSAADYADA GOLAHA WASIIRADA

1. Golaha Wasiirada waxa uu yeelan karaa guddi-hoosaadyo joogto ah ama kuwo aan joogto ahayn, kuwaas oo fududeynaya xil-gudashada Golaha Wasiirada.

2. Guddiyada joogtada ah iyo kuwa aan joogtada ahayn waxaa lagu dhisayaa xeer ra'iisul-wasaare, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

3. Golaha Wasiirada lama horgayn karo hindise-sharciyeedyo, xeer-nidaamiyeyaal, siyaasado iyo heshiisyo aan soo marin guddi-hoosaadyada ay khusayso ama aan loo dhammeystirin habraacyada dhaqangalka ah ee Xeer Ra'iisul-wasaare 125, ee ku taariikheysan 06/04/2023.

4. Guddi-hoosaadyadu waxa ay u xilsaaran yihiin ka baaraandegista arrimaha ku cad Faqradda 3[aad] ee Qodobkaan iyaga oo ka wada hadlaya wixii ka khuseeya una soo gudbinaya Xoghayaha Joogtada ah wixii go'aanno, talooyin, ama aragti ah.

5. Guddi-hoosaadyadu waxa ay yeelanayaan shaqaale uu u soo asteeyo Xoghayaha Joogtada ah ee Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha.

## CUTUBKA SEDDEXAAD
## XAFIISKA RA'IISUL-WASAARAHA

### *QODOBKA 9[AAD]*
### *XAFIISKA RA'IISUL-WASAARAHA*

1. Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha waxa uu magac ahaan beddelayaa Guddoonka Golaha Wasiirada ee ku qoran xeerarkii hore ee nidaamka xukuumadda.

2. Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha waxa uu ka kooban yahay Ra'iisul-wasaaraha, Ra'iisul-wasaare Ku-xigeen/Ku-xigeenno, Wasiiru-dowlaha Xafiiska, Xoghayaha Joogtada ah, Ku-xigeenka Xoghayaha Joogtada ah, iyo waaxyaha hoos yimaadda.

3. Ra'iisul-wasaaruhu waa madaxa Xukuumadda waana guddoomiyaha Golaha Wasiirada ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxa uuna u xilsaaran yahay arrimaha soo socda:

    a) Gudashada waajibaadka loogu xilsaaray Dastuurka, shuruucda kale ee dalka iyo xeer-nidaamiyeyaashooda;

    b) Qaadashada masuuliyadda howlaha aysan jirin cid gaar ah oo loo xilsaaray ama si guud u saameynaya howlaha Xukuumadda;

    c) Isugu yeerista iyo guddoominta kulamada Golaha Wasiirada isaga oo go'aaminaya ajendaha la horgeynayo;

    d) Haggaaminta, hagidda, xiriirinta, isu duwidda, iyo korjoogteynta howlaha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya;

    e) Jaangoynta yoolasha, hiigsiyada, iyo howlaha hortebinta u leh Xukuumadda si waafaqsan barnaamijka Xukuumadda ee Golaha Shacabku soo ansixiyay;

f) Oggolaanshaha saraakiisha Dowladda iyo khubarada kale ee ka qeybgalaya kulamada Golaha Wasiirada, haddii sharci gaar ah uusan waajibin ka qeybgalkooda;

g) Oggolaanshaha baahinta wararka iyo dukumiintiyada ku saabsan kulamada iyo go'aannada Golaha Wasiirada, si waafaqsan shuruucda dalka;

h) Meelmarinta, soo-saarista iyo hubinta dhaqangalka go'aannada Golaha Wasiirrada, si waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka;

i) U gudbinta Baarlamaanka Federaalka arrimaha u baahan ansixintiisa iyo hindise-sharciyeedyada isaga oo u gudbin kara codsiga kala noqoshada hindise-sharciyeedyada haddii loo baahdo;

j) U gudbinta Madaxweynaha JFS go'aannada ka soo baxay Golaha Wasiirada ee u baahan in lagu soo saaro xeer madaxweyne.

4. Ra'iisul-wasaare Ku-xigeenka/Ku-xigeennada waxa uu qabanayaa/qabanayaan howlaha loo xilsaaray si waafaqsan Qodobka 101aad ee Dastuurka.

5. Wasiiru-dowlaha Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha waxa uu la shaqaynayaa Ra'iisul-wasaaraha, waxa uuna qabanayaa howlaha uu u xilsaaro si waafaqsan Qodobka 102aad (3) ee Dastuurka.

6. Xoghayaha Joogtada ah ee Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha waa sarkaalka idman ee ugu saarreeya shaqaalaha Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, waxaa uu yeelanayaa ku-xigeen, waxaa uuna qabanayaa howlaha loogu xilsaaray Qodobka 10aad ee Xeer-nidaamiyahaan.

## QODOBKA 10AAD
## XILK A XOGHAYAHA JOOGTADA AH

Xoghayaha Joogtada ah ee Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha waxa uu u xilsaaran yahay arrimaha soo socda:

1. Isku-duwidda, kormeerka howlaha iyo waajibaadka waaxyaha Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha;

2. Jihaynta iyo maareynta arrimaha maamulka guud, arrimaha shaqaalaha iyo howlaha waaxyaha kala duwan ee Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha;

3. Xoghayaha Joogtada ah ee Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha waa Madaxa isku-xirka hay'adaha Xukuumadda, isaga oo raacaya tilmaamaha iyo awaamiirta Ra'iisul-wasaaraha;

4. Xiriirinta iyo isu-duwidda hirgelinta barnaamijyada waxqabadka iyo howlaha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, isaga oo fulinaya awaamiirta Ra'iisul-wasaaraha;

5. Xoghayaha Joogtada ah ee Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha waa hab-maamuuska iyo barotokoolka Agaasimeyaasha Guud iyo Xoghayeyaasha Joogtada ah marka ay kulmayaan, isaga oo shir-guddoominaya madashaas.

6. Wixii kale oo howlo ah ee uu u xilsaaro Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ama loogu xilsaaro shuruucda dalka.

## CUTUBKA AFARAAD
## KULAMADA GOLAHA WASIIRADA

### *QODOBKA 11AAD*
### *AJENDAHA*

1. Ajendaha kulamada Golaha Wasiirada waxaa go'aaminaya Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.

2. Agaasimaha Golaha Wasiirada, isaga oo ogaysiinaya Xoghayaha Joogtada ah, waxa uu si joogto ah ugu wargelinayaa Ra'iisul-wasaaraha dukumiintiyada iyo arrimaha u baahan in la horgeeyo Golaha Wasiirada.

3. Arrimaha la horgeynayo Golaha Wasiirada waa in loo soo gudbiyaa Agaasinka Golaha Wasiirada ugu yaraan hal toddobaad ka hor iyada oo Ra'iisul-wasaaruhu si KMG ah u laali karo ku-dhaqanka faqraddaan.

### *QODOBKA 12AAD*
### *GO'AANKA ISUGU YEERISTA KULAMADA*

1. Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxa uu awood u leeyahay in uu go'aamiyo isugu yeerista kulamada Golaha Wasiirada, isaga oo go'aankiisa ku wargelinaya Agaasinka Golaha Wasiirada xilli ku habboon.

2. Agaasinka Golaha Wasiirada waxa uu diyaarinayaa ogeysiiska kulanka iyo ajendihiisa, isaga oo sheegaya taariikhda, waqtiga, iyo goobta uu kulanku ka dhacaayo.

3. Ogeysiiska kulanka iyo ajendihiisa waa in la gaarsiiyo xubnaha Golaha Wasiirada iyo ciddii kale ee ka soo qeybgaleysa ugu yaraan hal maalin ka hor kulanka.

## QODOBKA 13AAD
## KULAMADA AAN CAADIGA AHEYN

Kulamada aan caadiga aheyn ee Golaha Wasiirada waxaa la isugu yeerayaa habraac gaar ah si waafaqsan shuruucda dalka iyada oo Ra'iisul-wasaaruhu uu isugu yeeri karo xilli kasta iyo goob kasta.

## QODOBKA 14AAD
## GOOBTA KULAMADA

Kulamada Golaha Wasiirada waxa ay ka dhacayaan hool gaar ah oo lagu diyaariyay Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha, haddii Ra'iisul-wasaaruhu uusan go'aamin in meel kale ama qaab kale lagu qabto, isaga oo xeerinaya duruufo gaar ah oo sidaasi khasbaya.

## QODOBKA 15AAD
## WAQTIGA KULAMADA

1. Kulamada caadiga ah ee Golaha Wasiirada waxa ay dhacayaan maalinta Khamiista ee toddobaad kasta.
2. Kulamada aan caadiga aheyn waxa ay dhici karaan waqti kasta oo uu go'aamiyo Ra'iisul-wasaaraha.

## QODOBKA 16AAD
## GUNTANKA KULAMADA

1. Kulamada caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn ee Golaha Wasiiradu waxay ku guntamayaan in ay goobjoog yihiin oo codeynayaan aqlabiyad boqolkiiba konton iyo hal dheeri (50%+1) tirada guud ee Wasaaradaha. Go'aannada Golaha Wasiiradu waxay ansax ku noqonayaan boqolkiiba konton iyo hal dheeri (50%+1) ee tirada xubnaha fadhigu ku guntamay. Haddii ay dhacdo in coddadku barbardhac noqdaan, waxaa meelmaraya dhankii uu Ra'iisul-wasaaruhu u codeeyo, haddii uu maqan yahayna Ra'iisul-wasaare Ku-xigeenka guddoominaya kulanka, haddii ay wada maqan yihiin, dhankii uu Wasiirka Cadaaladdu u codeeyo.
2. Ka hor inta aan la furin kulanka, Agaasinka Golaha Wasiirada waxa uu ku dhawaaqayaa magacyada xubnaha goobjoogga ah iyo kuwa maqan, isaga oo sidaasi u diiwaangelinaya.
3. Ka hor inta aan la codeynin, Ra'iisul-wasaaraha waxa uu farayaa in la hubiyo guntanka, isaga oo joojinaya wixii codeyn ah haddii guntanku uu gaari waayo aqlabiyadda (50% +1).

### *QODOBKA 17AAD*
### *HABKA DOODDA*

1. Arrin aan ku jirin ajendaha kulanka lama furi karo mana laga doodi karo inta ay socdaan kulamada caadiga ah ee Golaha Wasiirada. Haddii arrinku uu noqdo lagama maarmaan, waxaa go'aan ka gaaraya Ra'iisul-wasaaraha.

2. Faqradda kowaad ma khuseyso kulamada aan caadiga aheyn kuwaas oo lagu maamulayo habraac gaar ah.

3. Xubnaha ka qeybgalaya doodda ama qaba su'aalo waxaa hadalka siinaya Ra'iisul-wasaaruha waxaana diiwaangelinaya Agaasinka Golaha Wasiirada.

### *QODOBKA 18AAD*
### *JOOJINTA AMA HAKINTA KULAMADA*

1. Ra'iisul-wasaaraha, ama cidda meteleysa, waxa uu joojin karaa ama hakin karaa kulanka haddii ay noqoto lama huraan.

2. Haddii guntanka kulanka uu buuxsami waayo si waafaqsan Qodobka 16aad (Guntanka Kulamada), Ra'iisul-wasaaruhu waa in uu joojiyaa kulanka.

## CUTUBKA SHANAAD
## NIDAAMKA KULAMADA GOLAHA WASIIRADA

### *QODOBKA 19AAD*
### *ILAALINTA WAQTIGA KULAMADA*

1. Xubnaha iyo ciddii kale oo ka soo qeybgaleysa kulamada Golaha Wasiirada waa in ay ilaaliyaan waqtiga loogu talagalay in kulamadu furmaan sida ku cad ogeysiiska kulanka.

2. Haddii wasiir ama cid kale oo ka qeybgaleysa kulanka aanay iman karin ama ay ka maqnaaneyso kulanka waa in ay ogeysiis soo gaarsiisaa Agaasinka Golaha Wasiirada ugu yaraan hal maalin ka hor taariikhda kulanka.

### *QODOBKA 20AAD*
### *FADHIGA KULAMADA*

1. Xubnaha iyo ciddii kale oo ka qeybgaleysa kulamada Golaha Wasiirada waxa ay fariisaneysaa meesha loo asteeyay ee ku aaddan magaceeda.

2. Mudnaanta fadhiga ee xubnaha Golaha Wasiirada waxaa loo raacayaa sida ay ugu kala horreeyaan liiska wasaaradaha ku qoran Qodobka 24[aad] (2) ee xeer-nidaamiyahaan.

### QODOBKA 21[AAD]
### KA TAGISTA KULAMADA

Inta ay kulamadu socdaan, xubnaha iyo ciddii kale ee ka qeybgaleysa kulamada Golaha Wasiirada waxaa ka reebban in ay kulanka ka tagto haddii aan Ra'iisul-wasaaruhu u fasaxin.

### QODOBKA 22[AAD]
### NIDAAMKA

Ra'iisul-waasaraha waxa uu masuul ka yahay ilaalinta nidaamka iyo kala dambeynta inta kulamadu socdaan waxa uuna awood u leeyahay in uu tallaabo ka qaado xubnaha iyo ciddii kale ee ka qeybgaleysa kulamada Golaha Wasiirada.

### QODOBKA 23[AAD]
### DIIWAANKA HADAL-QORAALLADA IYO GO'AANNADA

1. Agaasinka Golaha Wasiirada waxa uu diiwaan-gelinayaa isaga oo nuqullo rasmi ah keydinaya dhammaan arrimaha looga hadlo kulamada Golaha Wasiirada iyo hadalka cid kasta oo ka qeybgashay kulamada.

2. Hadal-qoraallada kulan kasta waxaa laga akhrinayaa kulanka xiga iyada oo si gaar ah loo soo koobayo go'aannada uu Goluhu gaaray.

3. Agaasinka Golaha Wasiirada waxa uu si gaar ah u diiwaangelinayaa go'aannada ka soo baxa Golaha Wasiirada isaga oo ku summadeynaya lambarro taxane ah oo soconaya iyo waxa ay go'aannadu ku saabsan yihiin.

## CUTUBKA LIXAAD
## WASAARADAHA XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

### *QODOBKA 24AAD*
### *WASAARADAHA*

1. Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxa ay ka kooban tahay wasaaradaha uu soo ansixiyay Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waxa ayna ku shaqeynayaan nidaamkaan aasaasiga ah ee lagu faahfaahinayo xeerarkii maamulka ee Jamhuuriyaddii Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 139aad ee Dastuurka (sii socoshada xeerarka).

2. Wasaaradaha Xukuumadda JFS waxaa ay mudnaanta u kala leeyihiin sida ay u kala horreeyaan ee hoos ku xusan:

    a) Wasaaradda Cadaaladda iyo Dastuurka;

    b) Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka, iyo Dib-u-heshiisiinta;

    c) Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah;

    d) Wasaaradda Gaashaandhigga;

    e) Wasaaradda Amniga Gudaha;

    f) Wasaaradda Awqaafta iyo Arrimaha Islaamka;

    g) Wasaaradda Maaliyadda;

    h) Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga, iyo Horumarinta Dhaqaalaha;

    i) Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha;

    j) Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka;

    k) Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa;

    l) Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga;

    m) Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta;

    n) Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada/Rayidka;

    o) Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda;

    p) Wasaaradda Howlaha Guud iyo Guriyeynta;

q) Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyadda;

r) Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha;

s) Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha, iyo Tacliinta Sare;

t) Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada;

u) Wasaaradda Qoyska iyo Xuquuqul Insaanka;

v) Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada;

w) Wasaaradda Dhallinyarada iyo Ciyaaraha;

x) Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka, iyo Dalxiiska; iyo

y) Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada;

3. Ra'iisul-wasaaruhu waxa uu isku-shaandheyn ku sameyn karaa xubnaha Golaha Wasiirada ee Golaha Shacabku ansixiyay si waafaqsan Qodobka 100aad xarafkiisa (b) ee Dastuurka.

4. Howlaha wasaaradaha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxa ay u qaybsan yihiin loona fulinayaa sida lagu qeexay cutubkaan iyo xeerarka dhaqangalka ah.

## *QODOBKA 25AAD*
## *WASAARADDA CADAALADDA IYO DASTUURKA*

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leeyahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:
Arrimaha Caddaaladda:

1. Dejinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu hagaajinayo nidaamka caddaaladda ee Qaranka laguna ballaarinaayo adeegga caddaaladda iyada oo xoojinaysa xallinta mashaakilka bulshada, talinta sharciga iyo la-dagaalanka musuqmaasuqa;

2. kala shaqeynta Xukuumadda arrimaha ku dhaqanka sharciga iyo soo saarista hageyaasha shuruucda caddaaladda;

3. Ka qeyb-qaadashasa Dib-u-eegista ama qorista shuruucda Dalka iyo xeer-nidaamiyeyaasha, iyada oo waafajineysa shareecada Islaamka, Dastuurka, xeer-dhaqanka Soomaaliyeed, iyo halbeegyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, si waafaqsan Xeer Ra'iisul-wasaare Lr. 125, ee soo baxay 06/04/2023;

4. Ka qeyb-qaadashasa toosinta iyo tifaftirka heshiisyada caalamiga ah oo ay u soo gudbiso Wasaaradda Arrimaha Dibedda si waafaqsan Xeerka Ra'iisul-wasaare Lr. 125, ee ku taariikhaysan 06/04/2023.

5. La socodka xaaladda guud ee maxkamadaha, hannaannada kale ee xallinta murannada, iyo caqabadaha ka jira habsami-u-socodka adeegga caddaaladda iyada oo warbixinno joogto ah uga soo diyaarineysa Golaha Wasiirada;

6. Xoojinta iyo horumarinta iskaashiga garsoor ee dibedda, iyada oo dejinaysa siyaasadaha iyo shuruucda lagu nidaaminaayo iskaashigaasi;

7. Soo-jeedinta & dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu maamulayo nidaamka beddelka ah ee xallinta khilaafaadka (ADR) si waafaqsan xeerarka dalka;

8. Ka talabixinta horumarinta manhajka waxbarashada kulliyadaha qaanuunka iyo shareecada, iyadoo kaashaneysa wasaaradda waxbarashada kuna wacyigelineysa bulshada ku dhaqanka sharciga;

9. Nidaaminta iyo xoojinta mihnadaha madaxabannaan ee qareennada iyo nootaayooyinka iyo ururadooda iyada oo diyaarineysa siyaasadaha iyo shuruucda lagu horumarinayo;

10. Gacan-ku-heynta iyo maamulka barmaamijka kaalmada sharci ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya;

11. Nidaaminta iyo korjoogteynta maamulka iyo amniga xabsiyada iyo xarumaha dhaqancelinta iyada oo xoojineysa adeegyada dhaqancelinta ee lagu hirgelinayo xuquuqda gaarka ah ee dadka lagu haayo xabsiyada iyo xarumaha dhaqancelinta;

12. Korjoogtaynta hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha xeerarka caddaaladda;

13. Iskaashiga iyo wadashaqeynta dhammaan daneeyeyaasha adeegyada caddaaladda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyada oo kaashaneysa hay'adaha iyo ururada gobolka iyo kuwa caalamiga ah ee ka shaqeynaya horumarinta talinta iyo sarreynta sharciga.

**Arrimaha Dastuurka:**

14. Fududeynta iyo kaalmeynta hannaanka dib-u-eegista iyo dhammeystirka Dastuurka iyada oo u mareysa hannaan wadatashi oo loo dhan yahay;

15. Wacyigelinta shacabka Soomaaliyeed ee ku aaddan arrimaha Dastuurka iyo mabaadii'da uu ku dhisan yahay;

16. U fududeynta Baarlamaanka Federaalka iyo hay'adaha u xilsaaran qorista wax-ka-beddelka Dastuurka gacansiinta farsamo ee ay u baahan yihiin;

17. Dhaqangelinta Dastuurka iyada oo soo jeedineysa siyaasadaha iyo shuruucda aasaasiga ah ee lagu dhaqangelinayo Dastuurka lana soconeysa dhaqangalkiisa iyo caqabadaha ka jira;

18. Iskaashiga iyo wadashaqeynta dhammaan daneeyeyaasha adeegyada caddaaladda iyo dib-u-eegista Dastuurka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyada oo kaashaneysa hay'adaha iyo ururada gobolka iyo kuwa caalamiga ah ee ka shaqeynaya horumarinta caddaaladda, talinta sharciga, iyo arrimaha dastuurka.

## *QODOBKA 26AAD*
## *WASAARADDA AWQAAFTA IYO ARRIMAHA ISLAAMKA*

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leedahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soojeedinta, diyaarinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu maamulayo gudashada tiirarka diinta Islaamka (Salaadda, Soonka, arrimaha Xajka, iyo Zakada), fatwada, hay'adaha diiniga ah, dugsiyada Quraanka, masaajidda, xarumaha lagu barto diinta islaamka iyo waqafka iyada oo xoojineysa kaalinta horumarineed ee waqafka;

2. Horumarinta, taabbagelinta iyo xoojinta ku dhaqanka diinta Islaamka, iyadoo bulshada ka wacyigelinaysa fikradaha xagjirka ah iyo dhaqamada xun ee lidka ku ah diinta Islaamka iyo dhaqanka suubban ee Soomaaliyeed, xoojineysana wadanoolaanshiyaha iyo is-oggolaanshiyaha kala duwanaanta fikradaha ku saleysan fahamka diinta Islaamka;

3. Nidaaminta iyo horumarinta cilmi-baarista culuumta Islaamka iyo manaahijta madaxabannaan (nidaamka xalaqaadka) ee barashada diinta Islaamka, iyada oo diyaarineysa siyaasadaha iyo shuruucda lagu horumarinayo lana kaashaneysa wasaaradda waxbarashada;

4. Korjoogtaynta siyaasadeed ee hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha arrimaha islaamka iyo xeerarka kale ee dalka;

5. Iskaashiga iyo wadashaqeynta dhammaan daneeyeyaasha arrimaha diinta Islaamka, iyada oo la kaashaneysa hay'adaha iyo ururada gobolka iyo kuwa caalamiga ah ee ka shaqeeya xoojinta ku dhaqanka diinta Islaamka.

### QODOBKA 27AAD
### WASAARADDA ARRIMAHA DIBEDDA IYO ISKAASHIGA CAALAMIGA

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leedahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soojeedinta iyo dhaqangelinta siyaasadda arrimaha dibedda, si waafaqsan barnaamijka Xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyo xeerarka dhaqangalka ah;

2. Gacan-ku-heynta iyo maamulka xiriirada diblomaasiyadeed ee rasmiga ah ee dalku la leeyahay dalalka iyo hay'adaha gobolka ama caalamiga ah;

3. Iskaashiga iyo wadashaqeynta gobolka iyo caalamka ee ku saabsan arrimaha ay wasaaraddu u xilsaaran tahay, iyada oo isku dubbaridaysa xiriirka laamaha iyo hay'adaha Dowladda ee ku wajahan la macaamilka dalalka shisheeye, ururada gobolka, iyo kuwa caalamiga ah;

4. Ka qeybgalka wadahadallada ku saabsan heshiisyada caalamiga ah ee waxtarka u leh Qaranka, iyada oo u galeysa heshiisyadaasi si waafaqsan shuruucda dalka.;

5. Xoojinta iyo maareynta xiriirka caalamiga ah ee loogu adeegayo danaha Qaranka iyo danaha muwaadiniinta Soomaaliyeed ee ku nool dalka dibeddiisa (Qurba-joogta);

6. Fududaynta iyo ka qaybqaadashada habraacyada adeegyada baasaboorrada dowladda (diblomaasiga iyo shaqadda) iyo adeegyada qunsuliyeed ee loogu adeegayo muwaadiniinta Soomaaliyeed;

7. Suuqgeynta iyo bandhigidda dhaqanka iyo fursadaha dalka, iyadoo hadba la kaashanaysa wasaaradda ama hay'adda ay khuseyso, si loo soo jiito dadyowga adduunka;

8. Dejinta iyo horumarinta habmaamuuska Qaranka, si waafaqsan xeerarka iyo habraacyada u degsan dalka;

9. Soojeedinta, diyaarinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu maamulayo arrimaha ay wasaaraddu u xilsaaran tahay;

10. Korjoogtaynta siyaasadeed ee hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha arrimaha dibedda iyo xeerarka kale ee dalka.

## *QODOBKA 28AAD*
## *WASAARADDA GAASHAANDHIGGA*

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leedahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soojeedinta, diyaarinta, iyo dhaqangelinta siyaasadaha, shuruucda iyo qorshayaasha Qaran ee khuseeya dhismaha, tayeynta iyo korjoogteynta Ciidanka Xoogga Dalka iyo guud ahaan howlaha difaaca Qaranka, si waafaqsan Qaab-dhismeedka Amniga Qaranka iyo xeerarka Dalka.

2. Maareynta baahida tirada iyo tayada xubnaha Ciidanka Xoogga Dalka iyada oo ka shaqeyneysa sidii ay u heli lahaayeen tabobarro joogto ah iyo qalabkooda ciidan;

3. Hubinta, gudbinta iyo korjoogteynta miisaaniyadda Ciidanka Xoogga Dalka kadib marka Taliska Ciidanka XDS soo diyaariyo una soo gudbiyo Wasaaradda Gaashaandhigga iyo korjoogtaynta barnaamijyada daryeelka xubnaha ciidanka, si waafaqsan shuruucda dalka;

4. Diyaarinta iyo dhaqangelinta istiraatiijiyadda difaaca Qaranka si waafaqsan ujeeddooyinka Amniga Qaranka iyada oo Ciidanka Xoogga Dalka ay u rogayaan qorsheyaal howlgal kuna shaqeynayaan;

5. Horumarinta, gacan-siinta iyo maamulka kaabayaasha difaaca sida Isbitaalka CXD, jaamacadda difaaca iyo kulliyadaha takhasusaadka difaaca, mashaariicda wax-soo-saarka ee CXD, mashaariicda dhismeyaasha difaaca Qaranka, howlaha warbaahinta, howlaha amniga danabaysan ee khuseeya difaaca Qaranka iyo daryeelka naafada, qoysaska iyo shuhadada CXD;

6. Horumarinta daraasaadka iyo cilmibarista ku aaddan wax-soo-saarka iyo tayeynta difaaca Qaranka;

7. La socoshada xaaladda difaaca Qaranka iyada oo warbixinno joogto ah u soo diyaarineysa Golaha Wasiirada;

8. Korjoogtaynta siyaasadeed ee hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha difaaca iyo xeerarka kale ee dalka;

9. Dhisidda iyo xoojinta xiriirada dibadeed iyo iskaashiga caalamiga ah ee ku saabsan arrimaha difaaca iyo Ciidanka Xoogga Dalka iyada oo xoojinaysa iskaashiga iyo wadashaqeynta gobolka iyo caalamka.

## QODOBKA 29AAD
## WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, FEDERAALKA, IYO DIB-U-HESHIISIINTA

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leedahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soojeedinta, diyaarinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu maamulayo arrimaha gudaha (marka laga reebo amniga gudaha), iyada oo hirgelinaysa nidaamka federaalka iyo dib-u-heshiisiinta ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

2. Diyaarinta nidaam doorashooyin iyo xisbiyo suurtagelinaya in dalka ka qabsoonto doorashooyin toos ah (qof iyo cod) laguna gaaro xasilooni siyaasadeed;

3. Fududeynta iyo dhiirrigelinta dadaallada dib-u-heshiineed ee heerarka kala duwan ee bulshada, iyada oo xal waara u raadineysa arrimaha keenaya colaadaha iyo dhibaatooyinka la xiriira;

4. Taabbagelinta iyo xoojinta nidaamka federaalka ee dalka iyada oo loo marayo hannaan wadahadal, kheyraad-wadaag, iyo dhismaha dowlad-goboleedyo iyo dowlado hoose oo tayo leh;

5. Dejinta iyo hirgelinta siyaasado iyo barnaamijyo lagula tacaalayo saameynta ka dhalato masiibooyinka sida colaadaha, abaaraha iyo daadadka;

6. Diiwaan-gelinta ururada iyo hay'adaha aan dowliga ahayn;

7. Dejinta iyo korjoogtaynta siyaasadaha iyo shuruucda lagu maamulayo nidaamka diiwaangelinta dadweynaha (civil registration) iyo aqoonsiga qaranka, iyada oo ka shaqaynaysa sidii loo dhisi lahaa nidaamkaas loona kaydin lahaa xogaha muhiimka ah ee muwaadiniinta;

8. Diiwaangelinta odeyaasha dhaqanka, iyada oo u fududaynaysa arrimaha lagama maarmaanka u ah dhaqanka, howlaha dib-u-heshiisiinta iyo kuwa kale ee la xiriira nabadda iyo xasiloonida bulshada;

9. Korjoogtaynta siyaasadeed ee hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha arrimaha gudaha iyo xeerarka dalka;

10. Iskaashiga iyo wadashaqeynta dhammaan daneeyeyaasha howlaha wasaaradda, iyada oo kaashaneysa hay'adaha iyo ururada gobolka iyo kuwa caalamiga ah ee ka shaqeynaya horumarinta howlaha ay Wasaaraddu u igman tahay.

## QODOBKA 30AAD
## WASAARADDA AMNIGA GUDAHA

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leedahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soo-jeedinta, diyaarinta iyo dhaqangalinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu maareynayo amniga gudaha ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, laguna maamulayo hay'adaha siyaasad ahaan hoos yimaada wasaaradda sida: Ciidanka Boliiska Federaalka, Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka (NISA), Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda, iyo Hay'adda Maareynta Miinooyinka iyo Walxaha Qarxa, Hay'adda la-dagaalanka maandooriyaha iyo machadka Amniga Qaranka IWM;

2. kor u qaadista iyo horumarinta tirada iyo tayada xubnaha Ciidanka Boliiska Federaalka iyo Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka, iyada oo ka shaqeyneysa sidii ay u heli lahaayeen tabobarro joogto ah iyo qalabkooda ciidan;

3. Diyaarinta, hubinta, gudbinta, iyo korjoogteynta miisaaniyadda Ciidanka Boliiska, NISA iyo korjoogtaynta barnaamijyada daryeelka xubnaha ciidanka, si waafaqsan shuruucda dalka;

4. Diyaarinta iyo dhaqangelinta istiraatiijiyadda sugidda amniga, la tacaalidda dembiyada, la-dagaallanka argagixisada, la dagaallanka socdaalka sharci-darrada ah, maareynta dhibaatooyinka xuduudaha, iyo khataraha kale ee amniga gudaha si waafaqsan shuruucda dalka;

5. Taabbagelinta iyo horumarinta badqabka dadweynaha, iyada oo kala shaqeynaysa bulshada arrimaha nabad-gelyada iyo ka hortagga colaadaha;

6. La socodka xaaladaha amniga gudaha ee dalka, iyada oo warbixinno joogto ah ugu soo gudbinaysa Golaha Wasiirada;

7. Korjoogtaynta siyaasadeed ee hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha arrimaha amniga gudaha iyo xeerarka kale ee dalka;

8. Iskaashiga iyo wadashaqeynta gobolka iyo caalamka ee ku saabsan sugidda amniga gudaha iyo la dagaallanka dembiyada, iyada oo ka qeybgaleysa wixii heshiisyo ah ee waxtarka u leh Qaranka.

## *QODOBKA 31AAD*
## *WASAARADDA MAALIYADDA*

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leedahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soojeedinta, diyaarinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu maamulayo lacagta, dakhliga, kharashka, miisaaniyadda, hay'adaha maaliyadda, iyo nidaamka maamulka iyo maareynta maaliyadda guud ee Qaranka;

2. Diyaarinta iyo dhaqangelinta Xeerka Qoondaha Miisaaniyadda Qaranka, Ku-noqoshadeeda iyo Xisaab-xirkeeda, si waafaqsan Sharciga Maamulka Maaliyadda Guud Xeerka Iibka ee Qaranka iyo xeerarka kale ee Dalka;

3. Dhaqangelinta iyo korjoogteynta hannaanka maareynta kharashka iyo xisaab-celinta, si waafaqsan Sharciga Maamulka Maaliyadda Guud iyo xeerarka kale ee Dalka.

4. Dejinta iyo dhaqangelinta nidaam dakhli iyo canshuureed oo wax-ku-ool ah, si waafaqsan shuruucda dakhliga iyo canshuuraha dalka, iyada oo Golaha Wasiirada u soo gudbinaysa warbixin toddobaadle ah oo ku saabsan canshuur-dhaafka, sida oo kalena u gudbinaysa Baarlamaanka Federaalka warbixin seddex biloodle ah;

5. Maamulka iyo horumarinta nidaamka deymaha iyo dammaanadaha ee Dowladda Federaalka si waafaqsan shuruucda dalka, iyada oo isku dheellitireysa baahida jirta iyo culeyska ka imaan kara deymaha iyo dammaanadaha;

6. Dejinta iyo korjoogtaynta siyaasadaha & xeerarka khuseeya diiwan-gelinta iyo korjoogtaynta hantida guud ee Qaranka;

7. La socoshada arrimaha siyaasadda lacagta iyo maaliyadda ee Qaranka, iyada oo warbixinno joogto ah u soo gubinaysa Golaha Wasiirada;

8. Soo-jeedinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu nidaaminayo hay'adaha maaliyadda oo uu ku jiro nidaamka ka-hortagga lacag-dhaqidda iyo la-dagaalanka maalgelinta argagixisada, si waafaqsan xeerarka dalka;

9. Korjoogtaynta siyaasadeed ee hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha maaliyadda iyo xeerarka kale ee dalka;

10. Iskaashiga iyo wadashaqeynta dhammaan daneeyeyaasha howlaha wasaaradda iyada oo kaashaneysa hay'adaha iyo ururada gobolka iyo kuwa caalamiga ah ee ka shaqeynaya horumarinta arrimaha maaliyadda guud.

## QODOBKA 32^AAD
## WASAARADDA QORSHAYNTA, MAALGASHIGA IYO HORUMARINTA DHAQAALAHA

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leedahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soojeedinta, diyaarinta iyo dhaqangelinta qorshaha Qaranka, si waafaqsan barnaamijka Xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyo shuruucda kale ee dalka;

2. Soojeedinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha, istiraatiijiyadaha iyo shuruucda lagu maamulaayo laguna soo jiidanayo maalgashiga gudaha iyo dibedda;

3. Xiriirinta howlaha iyo barnaamijyada Xukuumadda iyo waafajintooda qorshaha Qaranka, iyada oo la shaqeyneysa wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee Dawladda;

4. La socoshada iyo qiimaynta xaaladda guud ee horumarka Qaranka, iyada oo warbixinno joogto ah ka soo saaraysa horumarka la sameeyay iyo caqabadaha jira ee hortaagan in la gaaro halbeegyada qorshaha Qaranka;

5. La-socodka, qiimeynta, iyo la-xisaabtanka hay'adaha aan dowliga ahayn ee fulinaya ama qeybta ka ah Qorshaha Qaranka, iyada oo hubinaysa howlaha ay dalka ka hayaan iyo in qorsheyaashoodu la jaanqaadayaan qorsheyaasha Qaranka;

6. Ka shaqeynta iyo xiriirinta iskaashiga dowladda, saaxiibada kala shaqeeya arrimaha horumarinta Qaranka iyo maalgashadeyaasha ee ku aaddan mashaariicda horumarineed ee Qaranka;

7. Korjoogtaynta siyaasadeed ee hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha Xukuumadda iyo xeerarka kale ee dalka;

8. Iskaashiga iyo wadashaqeynta gobolka iyo caalamka ee ku saabsan arrimaha ay wasaaraddu u xilsaaran tahay iyada oo ka qeybgaleysa wixii heshiisyo ah ee waxtarka u leh Qaranka.

## QODOBKA 33^AAD
## WASAARADDA WAXBARASHADA, HIDDAHA, IYO TACLIINTA SARE

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leedahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soojeedinta, diyaarinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu hirgelinayo waxbarashada aasaasiga ah iyo midda dugsiga sare ee Jamhuuriyadda

Federaalka Soomaaliya iyada oo dejinaysa manhaj qaran oo mideysan hubinaysana dhaqangalkiisa;

2. Nidaaminta iyo korjoogteynta arrimaha macaallimiinta iyo goobaha waxbarashada ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
3. Horumarinta iyo ololaynta helidda xuquuqda waxbarasho ee muwaadiniinta Soomaaliyeed, iyada oo xoojineysa dadaalladda lagu ballaarinaayo helidda waxbarasho tayo leh oo la awoodo.
4. Dejinta iyo dhaqangelinta nidaamka waxbarashada heerka jaamacadeed, iyada oo diiradda saareysa sidii loo soo saari lahaa qalinjebiyeyaal u diyaarsan suuqa shaqada kana jawaabi kara baahiyaha taagan;
5. Ilaalinta iyo horumarinta hiddaha uu dalku leeyahay, iyada oo ka shaqeyneysa sidii loo ilaalin lahaa, loona dhiirig-gelin lahaa dhaqammada suuban ee bulashadada Soomaaliyeed ay leedahay;
6. Xoojinta iyo horumarinta cilmi-baarista, hal-abuurka, fikirka madaxanannaan, wax-soo-saarka aqooneed iyo barashada culuumta kala duwan ee Qaranku u baahan yahay;
7. Korjoogtaynta siyaasadeed ee hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha waxbarashada iyo hiddaha iyo xeerarka dalka;
8. Iskaashiga iyo wadashaqeynta gobolka iyo caalamka ee ku saabsan arrimaha horumarinta waxbarashada, iyada oo ka qeybgaleysa wixii heshiisyo ah ee waxtar u leh Qaranka.

## *QODOBKA 34[AAD]*
## *WASAARADDA CAAFIMAADKA IYO DARYEELKA BULSHADA*

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leedahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soojeedinta, diyaarinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu nidaaminayo adeegyada caafimaadka, daawooyinka iyo daryeelka lagula tacaalayo xanuunnada;
2. Hirgelinta iyo korjoogteynta adeegyada caafimaad oo tayo leh, kuwaas oo qiimahoodu jaban yahay loona siman yahay;

3. Nidaaminta mihnadleyaasha caafimaadka, xarumaha bixiya adeegyada caafimaadka iyo ka talabixinta manhajka waxbarashada caafimaad, si waafaqsan shuruucda dalka;

4. Dejinta siyaasadda Qaranka ee maamulka iyo nidaamka xarumaha caafimaadka ee hay'adaha samafalku dalka ku leeyihiin, iyada oo hubineysa in aan loo adeegsan karin dano gaar ah;

5. Maamulka xarumadaha caafimaadka ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, iyada oo sidoo kale korjoogteynaysa adeegyada hooyada iyo dhallaanka ee xarumahaansi bixiyaan;

6. Maareynta caafimaadka guud ee dadweynaha, iyada oo dejineysa isla markaasna dhaqangelineysa istiraatiijiyadda Qaranka ee xakameynta iyo la tacaalidda cudurada faafa, ilaalinta iyo la-socodka caafimaadka xuduudaha dalka (portal health);

7. Ku wacyigelinta dadweynaha xuquuqdooda caafimaad iyo dammaanadaha uu sharcigu siinayo qofka bukaanka ah;

8. Korjoogtaynta siyaasadeed ee hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha caafimaadka dalka iyo xeerarka dalka;

9. Iskaashiga iyo wadashaqeynta gobolka iyo caalamka ee ku saabsan arrimaha caafimaadka iyada oo ka qeybgaleysa wixii heshiisyo ah ee waxtarka u leh Qaranka.

## *QODOBKA 35^AAD^*
## *WASAARADDA SHAQADA IYO ARRIMAHA BULSHADA*

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leedahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soojeedinta, diyaarinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu maamulayo arrimaha bulshada iyo shaqada oo ay ku jiraan arrimaha xirfadleyda Soomaaliyeed ee dibedda ku nool iyo shaqaalaha ajnabiga ah ee ka howlgala Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

2. Horumarinta iyo ilaalinta xuquuqda shaqaaleweynaha Soomaaliyeed, iyada oo ku shaqeyneysa shuruucda shaqada ee dhaqangalka ka ah dalka;

3. Diyaarinta iyo hirgelinta siyaasadaha, shuruucda, iyo istiraatijiyadaha ilaalinta bedqabka iyo badbaadada goobaha shaqada ee dalka, si waafaqsan shuruucda caalamiga ah iyo kuwa gobolka;

4. Dejinta iyo dhaqangelinta istiraatiijiyadaha, siyaasadaha, iyo shuruucda khusaysa tababarada, manhajka iyo aqoonsiga xirfadaha farsamo ee shaqada sannad iyo wixii ka yar.

5. Fulinta iyo nidaaminta barnaamijyada ilaalinta iyo daryeelka dadka nugul ee bulshada, iyada oo ururinaysa xogaha dhaqan-dhaqaale ee bulshada;

6. Korjoogtaynta barnaamijyada iyo sanduuqyada howlgabka, iyada oo u maareynaysa si waafaqsan Sharciga Howl-gabka iyo Shuruucda kale ee Dalka;

7. Uruurinta xogaha suuqa shaqada, iyada oo horumarineysa isla markaasna dhiirrigelineysa cilmi-baarista madaxabannaan ee arrimaha suuqa shaqada;

8. Korjoogtaynta siyaasadeed ee hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha shaqada iyo xeerarka kale ee dalka;

9. Iskaashiga iyo wadashaqeynta gobolka iyo caalamka ee ku saabsan shaqada iyo arrimaha bulshada iyada oo ka qeybgaleysa wixii heshiisyo ah ee waxtarka u leh Qaranka.

## *QODOBKA 36AAD*
## *WASAARADDA QOYSKA IYO XUQUUQUL INSAANKA*

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leedahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soojeedinta, diyaarinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu maareynayo arrimaha qoyska iyo xuquuqda aadanaha;

2. Awood-siinta haweenka Soomaaliyeed, iyada oo kala shaqeyneysa abuurista fursado dhaqaale, warbarasho, iyo ka qeybgalka siyaasadda lana dagaallameysa qaababka kala duwan ee takoorka iyo tacaddiyada ka dhanka ah haweenka Soomaaliyeed;

3. Horumarinta xuquuqda aadanaha ee dhammaan dadka ku nool geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya gaar ahaan carruurta, dadka baahiyaha gaarka ah qaba, iyo dadka kale ee nugul, iyada oo soo jeedineysa/diyaarineysa siyaasadaha iyo shuruucda lagu ilaalinayo laguna dhaqangelinayo xuquuqda aadanaha;

4. Wacyigelinta dadweynaha ee xuquuqda aadanaha iyo kala shaqeynta hay'adaha dowladda iyo bulshada rayidka ah arrimaha xuquuqda aadanaha;

5. Korjoogtaynta siyaasadeed ee hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha qoyska iyo xuquuqda aadanaha iyo xeerarka dalka;

6. Iskaashiga iyo wadashaqeynta gobolka iyo caalamka ee ku saabsan arrimaha xuquuqda aadanaha iyada oo ka qeybgaleysa wixii heshiisyo ah ee waxtarka u leh Qaranka.

### *QODOBKA 37AAD*
### *WASAARADDA BEERAHA IYO WARAABKA*

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leedahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soojeedinta, diyaarinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu maamulayo horumarinta wax-soo-saarka beeraha iyo waraabka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laguna kobcinayo horumarka waara ee dhaqaalaha Qaranka;

2. Casriyeynta, horumarinta, iyo bixinta adeegyada ay u baahan yihiin beeraleydu sida fidinta beeraha, tabobarka, abuur tayo leh, bacrimiyeyaasha, iyo kiimikada beeraha (dullin-dileyaasha iyo wixii la mid ah), dhismaha keydka cuntada, iyo qalabka beeraha;

3. Horumarinta iyo tayaynta waraabka (webiyada iyo biyaha roobka) iyo kaabeyaashiisa, iyada oo dhiirrigelinaysa isticmaalka waara ee biyaha;

4. Horumarinta iyo dhiirrigelinta cilmibaarista iyo hal-abuurka la xiriira beeraha, iyada oo laga faa'ideysanayo farsamooyinka casriga ah ee horumarinta beeraha lana xoojinayo maareynta iyo isticmaalka xogaha beeraha, iyo bixinta digniinaha cimilada iyo cudurrada saamaynta ku leh beeraha;

5. Nidaaminta iyo horumarinta dhulka beeraha iyo u fududeynta beeraleyda fursado maalgelin iyo adeegyo maaliyaadeed, iyada oo la kaashanaysa wasaaradaha iyo hay'adaha ay khuseyso;

6. Korjoogtaynta siyaasadeed ee hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha beeraha iyo waraabka iyo xeerarka kale ee dalka;

7. Iskaashiga iyo wadashaqeynta gobolka iyo caalamka ee ku saabsan arrimaha beeraha iyo wax-soo-saarkooda, iyada oo ka qeybgaleysa wixii heshiisyo ah ee waxtarka u leh Qaranka.

## *QODOBKA 38AAD*
## *WASAARADDA KALLUUMEYSIGA IYO DHAQAALAHA BULUUGGA*

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leedahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soojeedinta, diyaarinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu nidaaminayo kalluumeysiga iyo kheyraadka badda/dhaqaalaha buluugga;

2. Dejinta iyo dhaqangelinta istiraatiijiyadda horumarinta wax-soo-saarka kalluumeysiga iyada oo bixineysa rukhsadaha kalluumeysiga, si waafaqsan shuruucda dalka lana dagaallameysa kalluumeysiga sharci-darrada ah kana hortageysa kalluumeysiga aan laga warheynin ama aan nidaamsaneyn;

3. Ka shaqaynta badqabka iyo kobcinta khayraadka badda, iyada oo isku duwaysa lana kaashanaysa wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee ay khusayso sidii loo horumarin lahaa dhaqaalaha buluugga ah si waafaqsan qorshaha horumarinta/isbeddelka Qaranka;

4. U qareemidda ama Ku kaalmeynta adeegyada ay u baahanyihiin kalluumeysatada sida tabobarka iyo helidda qalabka kalluumeysiga;

5. U fududeynta kalluumeysatada fursado maalgelin iyo adeegyo maaliyaadeed, iyada oo xoojineysa helidda iyo gaarista suuqyo dhiirrigelinaya wax-soo-saarka kalluumeysiga iyo maalgashigiisa;

6. Horumarinta iyo dhiirrigelinta cilmi-baarista iyo hal-abuurka la xiriira kalluumeysiga, iyada oo laga faa'iideysanayo horumarka kalluumeysiga ee adduunku ku tallaabsaday, lana xoojinayo iskaashiga dowladda iyo maalgashadeyaasha ee ku iaaddan dhismaha meelaha lagu keydin karo kalluunka;

7. Korjoogtaynta siyaasadeed ee hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha kalluumeysiga iyo dhaqaalaha buluugga ah iyo xeerarka kale ee dalka;

8. Iskaashiga iyo wadashaqeynta gobolka iyo caalamka ee ku saabsan arrimaha kalluumeysiga iyo isticmaalka kheyraadka badda/dhaqaalaha buluugga ah iyada oo ka qeybgaleysa wixii heshiisyo ah ee waxtarka u leh Qaranka.

## QODOBKA 39AAD
## WASAARADDA XANNAANADA XOOLAHA, DHIRTA IYO DAAQA

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leedahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soojeedinta, diyaarinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu nidaaminayo xannaanada xoolaha, dhirta, iyo daaqa;

2. Bixinta iyo nidaaminta adeegyada xannaanada xoolaha iyo xirfadleyaasha ka shaqeeya oo ay ku jiraan ka hortagga ama xakameynta xanuunada, tallaalka, iyo daryeelkooda;

3. Horumarinta xoolo dhaqatada, kor-u-qaadidda iyo horumarinta wax-soo-saarka xoolaha iyo dhirta sida xabkaha iyo beyada;

4. La dagaallanka cudurada ku dhaca dhirta, iyada oo ka hortageysa keenista ama soo dejinta dhir jirran isla markaasna maareyneysa faafidda cudurada dhirta lana kaashanaysa Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka;

5. Horumarinta iyo maareynta dhulalka daaqa loo isticmaalo ama sidaasi loo asteeyay, iyada oo ka hortagaysa isticmaalka khaldan ee dhulalka daaqa, iyada oo la kaashanaysa Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka;

6. Horumarinta iyo dhiirrigelinta cilmibaarista ku saabsan xannaanada xoolaha, dhirta, iyo daaqa iyada la kaashaneysa aqoonyahan iyo hay'adaha ka shaqeeya;

7. Horumarinta iyo dhiirrigelinta mashaariicda iyo barnaamijyada dhireynta iyo la-dagaallanka saxaraha/lama dagaanka iyada oo kaashaneysa wasaaradda deegaanka;

8. Korjoogtaynta siyaasadeed ee hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha xannaanada xoolaha, dhirta iyo daaqa iyo xeerarka kale ee dalka;

9. Iskaashiga iyo wadashaqeynta gobolka iyo caalamka ee ku saabsan arrimaha xannaanada xoolaha, dhirta, iyo daaqa iyada oo ka qeybgaleysa wixii heshiisyo ah ee waxtarka u leh Qaranka.

## QODOBKA 40AAD
## WASAARADDA BATROOLKA IYO MACDANTA

Wasaaraddu, iyada oo waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leeyahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soojeedinta, diyaarinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu nidaaminayo soo-saarista iyo ka-faa'idaysiga batroolka iyo macdanta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

2. Dejinta iyo dhaqangelinta istiraatiijiyadda ka faa'iideysiga batrool iyo macdanta iyada oo u raadineysa maalgashadeyaal awood u leh soo-saarista batroolka iyo macdanta;

3. Dhaqangelinta Sharciga Batroolka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyada oo rukhsadaha iyo heshiisyada u bixineysa si waafaqsan shuruucda dalka;

4. Kor u qaadista dakhliga kasoo xarooda wax-soo-saarka batroolka iyo macdanta, iyada oo sida oo kale xoojineysa khibrad wadaagga iyo shaqaaleysiinta muwaadiniinta Soomaaliyeed;

5. Horumarinta iyo dhiirrigelinta aqoonta iyo xirfadaha la xiriira soo-saarista iyo ka faa'iideysiga batroolka iyo macdanta, iyada oo dhisaysa karaanka hay'adaha iyo midka kaadir ee aan looga maarmin maaraynta ka faa'iidaysiga batroolka iyo macdanta;

6. Korjoogtaynta siyaasadeed ee hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha batroolka iyo macdanta iyo xeerarka kale ee dalka.

## QODOBKA 41AAD
## WASAARADDA GANACSIGA IYO WARSHADAHA

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leedahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soojeedinta, diyaarinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu maamulayo ganacsiga iyo warshadaha ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

2. Ka qeybgalka heshiisyada gobolka iyo kuwa caalamiga ah ee lagu ballaarinayo suuqgeynta alaabaha lagu soo saaro dalka, iyada oo meteleysa danaha ganacsatada Soomaaliyeed diiraddana saareysa kor u qaadista wax-soo-saarka dalka iyo dhoofintiisa;

3. Fududaynta adeegyada lagu horumarinayo ganacsiga dalka sida tabobarro, fududeynta fursado maalgelin, iyo diiwaangelin fudud oo dhiiraggelinaysa ganacsiyada waaweyn, dhexe, iyo kuwa yaryar;
4. Horumarinta, xoojinta nidaamka iyo shuruucda lagu dhowrayo xuquuqda lahaanshaha fikirka, lagu nidaaminayo tartanka xalaasha ah ee ganacsiga, lagu hubinayo tayada badeecadaha, laguna dhowrayo xuquuqda macaamiisha;
5. Dejinta iyo dhaqangelinta istiraatiijiyadaha iyo siyaasadaha lagu abuurayo laguna horumarinayo wax-soo-saarka iyo warshadaha dalka, iyada oo laga faa'iideysanayo horumarka warshadeed ee adduunku ku tallaabsaday;
6. Korjoogtaynta siyaasadeed ee hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha ganacsiga iyo warshadaha iyo xeerarka kale ee dalka;
7. Iskaashiga iyo wadashaqeynta gobolka iyo caalamka ee ku saabsan arrimaha ganacsiga iyo warshadaha, iyada oo ka qeybgaleysa wixii heshiisyo ah ee waxtar u leh Qaranka.

### *QODOBKA 42AAD*
### *WASAARADDA DEKEDAHA IYO GAADIIDKA BADDA*

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leedahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soojeedinta, diyaarinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu maamulayo dekedaha Qaranka iyo gaadiidka badda ee isticmaalaya badda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
2. Ka shaqeynta maalgelinta dhismaha dekedaha iyo korjoogteynta howlgalladooda, iyo gacan-ku-heyntooda iyada oo fududeyneysa ganacsiga iyo maalgashiga;
3. Nidaaminta badmaridda gaadiidka badda iyo badqabkooda si waafaqsan shuruucda dalka iyo kuwa caalamiga ah, iyada oo bixineysa diiwaangalinta iyo rukhsadaha loo baahan yahay;
4. Dejinta iyo dhaqangelinta nidaamka guud ee ku saabsan xuduudaha badda iyo jaantuska khariiradaha badda, la socodka iyo diiwaangelinta dhaqdhaqaaqyada kala duwan ee ka jira badda ama xeebaha ee lagu sugayo badqabka badda, bixinta calanka, buugga gaadiidka badda, buugga badmaaxa, dhismaha iyo

maamulka dekedaha loo isticmaalo kalluumeysiga, dalxiiska iyo arrimo kale oo gaar ah;

5. Sahminta iyo diiwaangelinta dhulka xeebaha JFS, gacan-ku-hayntiisa, iyo ruqsad-bixintiisa si waafaqsan xeerarka dalka, iyada oo sida oo kale hirgelinaysa siyaasadaha iyo shuruucda ilaalinta deegaanka iyo nabadgalyadda badda;
6. Korjoogtaynta siyaasadeed ee hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha dekedaha iyo gaadiidka badda iyo xeerarka kale ee dalka;
7. Iskaashiga iyo wadashaqeynta gobolka iyo caalamka ee ku saabsan arrimaha horumarinta dekedaha iyo badmaridda iyada oo ka qeybgaleysa wixii heshiisyo ah ee waxtarka u leh Qaranka.

## QODOBKA 43AAD
## WASAARADDA GAADIIDKA IYO DUULISTA HAWADA/RAYIDKA

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leedahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soojeedinta, diyaarinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu maamulayo gaadiidka dhulka iyo cirka, isticmaalka waddooyinka, hawada, iyo garoomada diyaaradaha;
2. Horumarinta iyo casriyeynta dhismaha waddooyinka, garoomada diyaaradaha iyo korjoogteynta howlgalladooda, iyo gacan-ku-heyntooda/maamulkooda, iyada oo fududeyneysa amniga, ganacsiga, iyo isu socodka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
3. Nidaaminta iyo korjoogteynta hay'adaha maamulaya habsami-u-socodka iyo badqabka isticmaalka waddooyinka, hawada, iyo garoomada diyaaradaha;
4. Dhaqangelinta shuruucda dalka iyo kuwa caalamiga ah ee ku saabsan duulimaadyada rayidka iyada oo hubinaysa hirgelinta nidaam rukhsad bixin oo tayo leh iyo adeegyada kale ee loo baahan yahay;
5. Korjoogtaynta siyaasadeed ee hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha gaadiidka iyo duulista rayidka iyo xeerarka kale ee dalka;

6. Iskaashiga iyo wadashaqeynta gobolka iyo caalamka ee ku saabsan arrimaha gaadiidka dhulka iyo cirka iyo duulimaadka rayidka iyada oo dalka ku metelaysa wixii heshiisyo ah ee waxtarka u leh Qaranka.

## *QODOBKA 44[AAD]*
## *WASAARADDA TAMARTA IYO KHEYRAADKA BIYAHA*

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leeyahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soojeedinta, diyaarinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu nidaaminayo adeegyada korontada iyo biyaha iyada oo la xaqiijinayo isku-filnaanshaha biyo iyo koronto ee Qaranka;

2. Ka shaqeynta maalgelinta iyo nidaaminta dhismaha kaabeyaasha korontada iyo biyaha oo ammaan ah, iyada oo fududeyneysa kobaca ganacsiga iyo horumarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

3. Nidaaminta adeegyada korontada iyo biyaha, iyada oo ka shaqeyneysa sidii loo heli lahaa koronto iyo biyo tayo leh oo joogto ah qiimahooduna uu jaban yahay;

4. Horumarinta iyo dhiirrigelinta cilmi-baarista iyo hal-abuurka ku saabsan isticmaalka waara ee biyaha, iyada oo ka shaqeyneysa hannaan mideysan oo lagu maamulo kheyraadka biyaha;

5. Ka shaqeynta sidii loo heli lahaa loona isticmaali lahaa ilo kale oo koronto ama tamar laga dhaliyo kuwaas oo aan ku tiirsaneyn shidaalka ama batroolka;

6. Ku wacyigelinta bulshada isticmaalka miisaaman ee korontada iyo biyaha, iyada oo la kaashaneysa hay'adaha bixiya adeegyada korontada iyo biyaha;

7. Korjoogtaynta siyaasadeed ee hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha tamarta iyo kheyraadka biyaha iyo xeerarka kale ee dalka;

8. Iskaashiga iyo wadashaqeynta gobolka iyo caalamka ee ku saabsan arrimaha korontada iyo biyaha iyada oo ka qeybgaleysa wixii heshiisyo ah ee waxtarka u leh Qaranka.

## *QODOBKA 45AAD*
## *WASAARADDA ISGAARSIINTA IYO TEKNOLOJIYADDA*

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leedahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soojeedinta, diyaarinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu nidaaminayo boostada, isgaarsiinta, iyo teknolojiyadda;

2. Dejinta iyo dhaqangelinta istiraatiijiyadda Qaranka ee lagu horumarinayo isticmaalka boostada, isgaarsiinta, iyo teknolooyiyadda taas oo suurtagelineysa in adeegyadaan lagu helo qiimo macquul ah ayna gaaraan deegaannada kala duwan ee dalka;

3. Ka shaqeynta maalgelinta iyo nidaaminta dhismaha nidaamyo teknoloojiyeed oo ammaan ah iyada oo fududeyneysa ganacsiga iyo dhaqaalaha dhiijitaal ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

4. Horumarinta aqoonta iyo xirfadaha isticmaalka teknoloojiyadda ee muwaadiniinta Soomaaliyeed iyada oo ku dhiirrigelineysa una fududeyneysa isticmaalka teknoloojiyadda iyo Internet-ka;

5. Dejinta iyo dhaqangelinta istiraatiijiyadda Qaranka ee casriyeynta adeegyada dowladda iyo xiriirka ka dhexeeya dowladda iyo muwaadinka, iyada oo laga faa'iideysayo teknoloojiyadda casriga ah;

6. Dejinta iyo dhaqangelinta hannaanka sugidda amniga nidaamyada teknolojiyadeed gaar ahaan kuwa muhiimka u ah Amniga Qaranka, si waafaqsan ujeeddooyinka Amniga Qaranka;

7. Korjoogtaynta siyaasadeed ee hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha isgaariinta iyo teknooloojiyadda iyo xeerarka kale ee dalka;

8. Iskaashiga iyo wadashaqeynta gobolka iyo caalamka ee ku saabsan boostada, isgaarsiinta, iyo teknolojiyadda iyada oo ka qeybgaleysa wixii heshiisyo ah ee waxtar u leh Qaranka.

## *QODOBKA 46[AAD]*
## *WASAARADDA DEEGAANKA IYO ISBEDDELKA CIMILADA*

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leedahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soojeedinta, diyaarinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu maareynayo arrimaha ilaalinta deegaanka iyo isbeddelka cimilada ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

2. Dejinta iyo korjoogtaynta istiraatiijiyadaha ilaalinta iyo dhawrista deegaanka (badda iyo barriga) iyada oo laga hortagaayo wax kasta oo wax u dhimaya kala-duwanaanshaha noole ee dabiiciga ah iyo hannaanka deegaameed ee dabiiciga ah, iyada oo la kaashanaysa wasaaradaha iyo hay'adaha ay khuseyso;

3. Dejinta iyo fulinta ololeyaal iyo barnaamijyo wacyigelineed oo ku saabsan ilaalinta deegaanka iyo dhibaatooyinka ka dhalan kara isticmaalka khaldan ee deegaanka iyo kheyraadka ceegaaga;

4. Horumarinta iyo dhiirrigelinta cilmibaarista iyo hal-abuurka la xiriira ilaalinta deegaanka iyo wax-ka-qabashada dhibaatooyinka ka dhasha saamaynta isbeddelka cimilada;

5. U qareemidda ama u istaagidda iyo abaabulka ilaha dhaqaale ee wax looga qabanayo dhibaabtooyinka deegaanka ee ka dhasha saamaynta isbeddelka cimilada adduunka;

6. Korjoogtaynta siyaasadeed ee hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha deegaanka iyo isbeddelka cimilada iyo xeerarka kale ee dalka;

7. Iskaashiga iyo wadashaqeynta gobolka iyo caalamka ee ku saabsan arrimaha deegaanka iyo isbeddelka cimilada iyada oo ka qeybgaleysa wixii heshiisyo ah ee waxtarka u leh Qaranka.

### QODOBKA 47AAD
### WASAARADDA WARFAAFINTA, DHAQANKA, IYO DALXIISKA

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leedahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soojeedinta, diyaarinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha, shuruucda, iyo xeer-nidaamiyeyaasha lagu nidaaminayo warhaahinta xorta ah, xaqa helidda xogta ay dowladdu heyso, dhaqanka, iyo dalxiiska;

2. Dejinta iyo dhaqangelinta istiraatiijiyadaha la xiriira midaynta iyo isku duwidda farriimaha iyo hawlaha wacyi-galineed ee dowladdu u gudbinayso dadweynaha;

3. Ilaalinta iyo horumarinta dhaqanka, fanka iyo suugaanta Soomaaliyeed, iyada oo dhiirrigelineysa dhaqanka suuban ee shacabka Soomaaliyeed;

4. Dejinta iyo dhaqangelinta istaraatiijiyadaha iyo mashaariicda lagu horumarinayo dalxiiska Soomaaliyeed laguna soo jiidanayo dalxiisayaasha si kor loogu qaado dakhliga ka soo xaroonaya dalxiiska;

5. Korjoogtaynta siyaasadeed ee hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha warfaafinta, dhaqanka iyo dalxiiska iyo xeerarka kale ee dalka;

6. Iskaashiga iyo wadashaqeynta gobolka iyo caalamka ee ku saabsan warfaafinta, dhaqanka, dalxiiska, xorriyadda saxaafadda, iyo xorriyadda helidda xogaha iyada oo ka qeybgaleysa wixii heshiisyo ah ee waxtar u leh Qaranka.

### QODOBKA 48AAD
### WASAARADDA HOWLAHA GUUD IYO GURIYEYNTA

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leeyahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soojeedinta, diyaarinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu nidaaminayo naqshadeynta iyo maamulka dhulalka magaalooyinka, dhismooyinka, dhismaha jidadka, dekedaha, garoomada diyaaradaha, iyo biyo xireennada ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

2. Qorsheynta, naqshadeynta, iyo korjoogteynta dhismaha iyo dayactirka dhismeyaasha dowladda iyo kuwa danta guud loo dhisayo ama lagu kaalmeynayo dadka saboolka ah;

3. Soojeedinta iyo dhaqangelinta xeerarka dhismaha iyo halbeegyada badqabka dhismeyaasha iyada oo xeerarkaasi sida oo kale ku nidaaminaysa dhammaan arrimaha la xiriira dhisidda noocyada kala duwan ee guryaha iyo shirkdaha/xirfadleyaasha ka shaqeynaya;

4. Dejinta iyo dhaqangelinta siyaasadda guud ee naqshadeynta magaalooyinka iyo maamulka dhulka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

5. Horumarinta iyo dhiirrigelinta maalgashiga dhismaha guryaha, iyada la kaashaneysa Wasaaradda Qorsheynta, Wasaaradda Ganacsiga, iyo rugaha ganacsiga Soomaaliyeed;

6. Korjoogtaynta siyaasadeed ee hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha howlaha guud iyo guriyeynta iyo xeerarka kale ee dalka;

7. Iskaashiga iyo wadashaqeynta gobolka iyo caalamka ee ku saabsan hawlaha guud iyo guriyeynta iyada oo ka qeybgaleysa wixii heshiisyo ah ee waxtar u leh Qaranka.

## QODOBKA 49AAD
## WASAARADDA DHALLINYARADA IYO CIYAARAHA

Wasaaraddu, iyada oo aan waxba loo dhimeynin awoodaha iyo masuuliyadaha ay ku leedahay xeerarka dalka, waxa ay u xilsaaran tahay arrimaha soo socda:

1. Soojeedinta, diyaarinta iyo dhaqangelinta siyaasadaha iyo shuruucda lagu horumarinayo dhalinyarada iyo ciyaaraha ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

2. Diyaarinta iyo dhaqangelinta barnaamijyada horumarinta dhalinyarada gaar ahaan arrimaha waxbarashada, xirfadaha, ka qeybgalka siyaasadda, iyo dib-u-heshiisiinta bulshada iyada oo la kaashaneysa wasaaradaha ay khuseyso;

3. Nidaaminta iyo dhiirrigelinta xiriirada ciyaaraha Qaranka iyo fududeynta ka qeybgalka tartamada gobolka iyo kuwa caalamiga ah, iyada oo ahmiyad gaar ah siinaysa xirfadleyaasha ciyaaraha kala duwan ee Qaranka;

4. Ka shaqeynta maalgelinta dhismaha iyo horumarinta xarumaha lagu soo bandhigi karo ciyaaraha kala duwan ee Qaranka, iyada oo la kaashaneysa hay'adaha dowladda iyo ciddii kale ee daneyneysa;

5. Horumarinta iyo dhiirrigelinta tartanka ciyaaraha ee gudaha dalka, iyada oo la kaashaneysa ururada jira iyo cid kasta oo daneyneysa qabashada tartan ciyaareed ee heerarka kala duwan ee bulshada;
6. Korjoogtaynta siyaasadeed ee hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah ee hoos yimaada Wasaaradda, iyada oo hubinaysa dhaqangalka siyaasadaha dhallinyarada iyo cayaaraha iyo xeerarka kale ee dalka;
7. Iskaashiga iyo wadashaqeynta gobolka iyo caalamka ee ku saabsan arrimaha dhalinyarada iyo ciyaaraha iyada oo ka qeybgaleysa wixii heshiisyo ah ee waxtarka u leh Qaranka.

## *QODOBKA 50^AAD^*
## *WAAJIBKA WADASHAQEYNTA WASAARADAHA*

1. Wasaaraduhu waa in ay ku wada shaqeeyaan iskaashi, iyaga oo ka wada tashanaya kana heshiinaya arrimaha ka wada dhaxeeya, Ra'iisul-wasaaruhuna waxa uu abuuri karaa guddiyo wasaaradeed ee xiriiriya howlaha ka dhexeeya wasaaradaha.
2. Haddii uu yimaado khilaaf la xiriira howlaha ka dhexeeya wasaaradaha, waxaa go'aan ka gaaraya Ra'iisul-wasaaraha marka uu dhageysto talada Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda.
3. Wasaaradaha Dowladda Federaalka waxa ay wada shaqeyn la yeelanayaan wasaaradaha iyo hay'adaha ay shaqo wadaagga yihiin ee heer dowlad goboleed, iyaga oo iska kaashanaya sidii loogu wada shaqeyn lahaa nidaamka federaalka gudihiisa, si waafaqsan Dastuurka, shuruucda kale ee dalka, iyo heshiisyada ay gaaraan labada heer dowladeed.

## CUTUBKA TODDOBAAD
## NIDAAMKA MAAMULKA GUUD

### *QODOBKA 51AAD*
### *SHAQADA WASIIRKA*

Shaqada wasiirka waxaa ka mid ah:

1. Curinta siyaasadaha iyo xeerarka lagu hirgelinaayo waajibaadka ay wasaaraddu u xilsaaran tahay, isaga oo ka duulaya barnaamijka Xukuumadda iyo qorsheyaasha Qaranka si waafaqsan xeer-nidaamiyahaan iyo shuruucda kale ee dalka;

2. Oggolaanshaha miisaaniyad-sanadeedka, hindise-sharciyeedyada, xeer-nidaamiyeyaasha, siyaasadaha, iyo istiraatiijiyadaha wasaaradda si waafaqsan xeer-nidaamiyahaan iyo shuruucda kale ee dalka;

3. Horgaynta Golaha Wasiirada iyo Baarlamaanka hindise-sharciyeedyada iyo arrimaha kale ee u baahan ansixintooda;

4. Jihaynta iyo hubinta shaqada Agaasimaha Guud ama Xoghayaha Joogtada ah, si waafaqsan shuruucda shaqaalaha rayidka iyo Sharciga maamulka maaliyadda guud iyo xeerarka kale ee dalka;

5. Hubinta fulinta xeerarka, hagayaasha, iyo habraacyada loogu talagalay maamulka iyo maaraynta hantida ma guurtada ah ee Wasaaradda;

6. U soo-jeedinta Ra'iisulwasaaraha XFS qaab-dhismeedka iyo tirada waaxyaha ee Wasaaradda, si waafaqsan xeer-nidaamiyahaan, si waafaqsan Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dawladda, xeer-nidaamiyahan iyo shuruucda kale ee dalka;

7. Magacaabista iyo xil-ka-qaadista agaasime waaxeedyada wasaaradda, kadib marka uu helo talada Agaasimaha Guud ama Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda, lana soo dhammaystiro habraacyada shaqaalaysiinta ee Sharciga Shaqaalaha Rayidka iyo habraaca shaqaaleysiinta ee ku xusan Sharciga Shaqaaalaha Rayidka ee Dowladda iyo Xeerarka kale ee Dalka;

8. U soo-jeedinta Ra'iisul-wasaaraha tallaabo ka qaadista ku habboon Agaasimaha Guud ama Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda, marka uu ku kaco falal lid ku ah oo ka hor'imaanaya Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyo xeerarka kale ee dalka kuna mutaysan karo anshaxmarin ay ka mid noqon karaan shaqa-ka-joojin ama xil-ka-qaadis; iyo

9. Arrimihii kale ee soo galaya awoodaha fulineed ee wasiirka ama loogu xilsaaray shuruucda dalka.

## QODOBKA 52AAD
## SHAQADA WASIIRU-DOWLAHA IYO WASIIR-KU-XIGEENKA

1. Wasiiru-dowlaha wasaaradda waxa uu gacansiinayaa wasiirka, isaga oo qabanaya howlaha uu Ra'iisul-wasaaruhu u xilsaaro iyo shaqada wasiirka marka uu wasiirku maqan yahay. Wasiiru-dowlaha waxa uu warbixin bille ah u soo gudbinayaa Ra'iisul-wasaaraha XFS.

2. Wasiir ku-xigeenka wasaaradda waxa uu gacansiinayaa wasiirka, isaga oo qabanaya howlo gaar ah oo uu wasiirku xeer ugu xilsaaro iyo shaqada wasiirka marka ay wada maqan yihiin wasiirka iyo wasiiru-dowluhu.

3. Wasiirka ayaa ugu sarreeya hoggaanka siyaasadeed ee wasaarada, isaga ayaana jihaynaya siyaasadda iyo howlaha wasaaradda, marka wasiirku maqan yahay, ku-simaha waa in uu la socodsiiyaa wixii tallaabooyin ah oo aan ahayn howlaha maalinlaha ah.

4. Hoggaanka siyaasadeed (wasiirka, wasiiru-dowlaha, iyo wasiir-ku-xigeenka) ee wasaarad kasta waxa uu yeelanayaa kulan toddobaadle ah oo looga arrinsanayo howlaha iyo qorsheyaasha wasaaradda, iyada oo ay ka soo qeybgalayaan Xoghayaha Joogtada ah ama Agaasimaha Guud ee wasaaradda iyo ciddii kale ee loogu yeero waxa ayna bixinayaan warbixinno dhammaystiran.

5. Wasiiru-dowleyaasha Xafiisyada Madaxweynaha iyo Ra'iisul-wasaaraha waxa ay la shaqaynayaan Madaxweynaha iyo Ra'iisul-wasaaraha, iyaga oo sidoo kale qabanayaan howlaha loogu xilsaaray si waafaqsan Qodobka 102aad (3) ee Dastuurka.

## QODOBKA 53AAD
## SHAQADA AGAASIMAHA GUUD AMA XOGHAYAHA JOOGTADA AH

1. Wasaarad kasta waxa ay yeelaneysaa Agaasime Guud marka laga reebo Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo wasaaradaha loo xilsaaray ugu yaraan howlaha labo wasaaradood oo la isku daray lehna ugu yaraan labo agaasime guud, kuwaas oo yeelanaya xoghaye joogto ah oo noqonaya sarkaalka idman ee wasaaradda ahna masuulka ugu sarreeya hawlaha maamulka ee wasaaradda.

2. Agaasimaha guud ama xoghayaha joogtada ah waa sarkaalka idman ee wasaaradda, waana derejada ugu sarreysa ee shaqaalaha rayidka ah ee wasaaraddaasi, waxaana lagu soo magacaabayaa si waafaqsan Qodobka 117aad ee Dastuurka KMG ah, iyada oo lagu qaadanayo hannaanka tartanka furan ee lagu qeexay Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda iyo shuruucda kale ee dalka kuna salaysan mudnaan-xulasho, karti iyo hufnaan.

3. Agaasimaha guud ama xoghayaha joogtada ah wuxuu mas'uul ka yahay:

   a) Xaqiijinta u hoggaansanaanta shuruucda Qaranka, xeerarka iyo waajibaadka caalamiga ah ee la xiriira waajibaadka iyo howlaha maamul ee Wasaaradda;

   b) Diyaarinta iyo hirgelinta siyaasadda iyo istiraatiijiyadaha wasaaradda, isaga oo fulinaya tilmaamaha wasiirka;

   c) Qaadashada kaalintiisa maamul ee ku aaddan la socodka iyo habsami-u-socodsiinta qorshayaasha istiraatiijiyadeed ee wasaaradda, isaga oo hubinaya in hawlaha maamul ee Wasaaraddu ay la jaanqaadayaan barnaamijka Xukuumadda;

   d) Diyaarinta miisaaniyadda iyo qorsheyaasha sannadlaha ah ee wasaaradda oo ay ku jiraan qorshaha kharash-bixinta iyo midka iibka;

   e) Fulinta miisaaniyadda iyo kormeeridda hawlaha la xiriira maamulka si waafaqsan shuruucda nidaaminaysa maamulka iyo maareynta maaliyadda guud iyo shuruucda kale ee dalka;

   f) Fulinta dhammaan arrimaha kaga aaddan maamulka lacagta, hantida iyo qaamaha Wasaaradda, si waafaqsan shuruucda dalka;

   g) Fududeynta howlaha farsamo ee isku xirka iyo wada shaqaynta Wasaaradda iyo hay'adaha kale ee Dowladda iyo saaxiibada caalamiga ah;

   h) U soo-jeedinta wasiirka hindiseyaal lagu xoojinayo waxqabadka Wasaaradda iyo hay'adaha kale ee hoos yimaada iyo samaynta halbeegyadii lagu qiimayn lahaa;

   i) Horumarinta hufnaanta iyo isla xisaabtanka dhammaan hawlaha maamul ee Wasaaradda oo ay ku jiraan maamulka maaliyadda guud iyo wax iibsiga;

   j) Socodsiinta hawlaha maamul ee Wasaaradda isaga oo qiimayn iyo la xisaabtan joogto ah ku samaynaya agaasime waaxeedyada Wasaaradda, si waafaqsan sharciga shaqaalaha rayidka ah;

   k) U warbixinta joogtada ah ee kulanka toddobaadlaha ah oo ay isugu imaanayaan hoggaanka siyaasadeed iyo maamulka ee wasaaradda; iyo

   l) Fulinta hawlaha kale ee uu wasiirku u igmado.

4. Agaasimaha Guud ee Madaxtooyada, Xoghayaha Joogtada ah ee Xafiiska Ra'iisulwasaaraha iyo saraakiisha idman ee hoggaaminaya howlaha maamul ee

hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha ah waxa ay leeyihiin waajibaadka agaasimaha guud ee lagu sheegay Faqradda 3aad ee Qodobkaan, iyaga oo u maareynaya arrimaha maamulka iyo shaqaalaha, si waafaqsan shuruucda maamulka maaliyadda guud iyo sharciga shaqaalaha rayidka ee Dowladda Federaalka.

## QODOBKA 54AAD
## MAAREYNTA SHAQAALAHA DOWLADDA

1. Hannaanka maareynta shaqaalaha, shaqaaleysiinta iyo dalacsiinta ee dhammaan hay'adaha Dowladda, waa in loo raacaa Xeerka Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda iyo xeerarka kale ee dalka, iyada oo lagu saleynayo tartan furan oo ku dhisan mudnaan xulasho ama istaahil-xulasho, karti, iyo hufnaan.

2. Shaqaalaha rayidka ah laguma sameyn karo shaqa-ka-joojin ama xil-ka-qaadis haddii aan loo marin habraacyada ku tilmaaman Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyo xeerarka kale ee dalka.

3. Shaqaalaha rayidka ah oo ay ku jiraan saraakiisha maamulka sare ee Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowladda waxaa ka reebban in ay dhinac-ka-noqdaan arrimaha siyaasadda, qofkii lagu helo waxaa uu mutaysanayaa in laga qaado tallaabo sharci ah oo waafaqsan Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

## QODOBKA 55AAD
## QAAB-DHISMEEDKA HAY'ADAHA DOWLADDA

1. Wasaarad kasta waxa ay yeelanaysaa qaab-dhismeed uu ugu sarreeyo hoggaanka siyaasadeed ee wasaaradda kana kooban wasiirka, wasiiru-dowlaha, wasiir-ku-xigeenka, xafiiska agaasimaha guud ama xoghayaha joogtada ah, xafiisyo, unugyo iyo waaxyo hoos tagaya agaasimaha guud ama xoghayaha joogtada ah.

2. Wasaarad kasta waxaa waajib ku ah in ay yeelato waaxyaha iyo unugyada soo socda:

    a) Waaxda maamulka iyo maaliyadda;

    b) Waaxda qorshaynta;

    c) Waaxda ama qeybta shaqaalaha;

    d) Waaxda ama Unugga Xusuus-dhawrka iyo Xoghaynta;

    e) Unugga hanti-dhawraha gudaha;

    f) Waaxda ama unugga arrimaha sharciga; iyo

g) Unugga barnaamijyada gaarka ah.

3. Unugyada sida gaarka ah loogu xusay xarfaha (e) iyo (g) waxaa ay si toos ah u hoostagayaan xafiiska agaasimaha guud ama xoghayaha joogtada ah. Waaxda Xusuus-dhowrka iyo Waaxda Arrimaha Sharciga waxaa lagu salaynayaa baahida wasaaradda, hay'adda ama xafiiska ay khuseyso.

4. Wasaarad kasta waxaa ay yeelanaysaa waaxyo u xilsaaran waajibaadka wasaaradda, qeybo hoostagaya waaxyaha iyo unugyo joogto ah ama aan joogto ahayn oo hoostagaya qeybaha. Waajibaadka shaqo ee unugyadu kuma jirto kaalin maamul ama agaasin.

5. Waaxyaha wasaaradda iyo qeybaha ka hooseeya ee la abuurayo waa in ay ka tarjumayaan waajibaadka loo igmaday iyo ujeeddooyinka ay u taagan tahay wasaaraddu.

6. Marka la abuurayo waax ama qeybo waaxda hoostagaysa, marka laga reebo kuwa ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan, waxaa waajib ah in la raaco shuruudaha soo socda:

    a) Waax waxaa la abuuri karaa ama ay jiri kartaa oo keliya haddii ay waaxdu leedahay ugu yaraan labo (2) qeybood oo isku darka shaqaalaha rayidka ah ee ka hawlgala ay gaarayaan 20 shaqaale ah, waxaana maamulaya agaasime waaxeed, kaas oo ka mid noqonaya heerka maamulka sare ee Wasaaradda.

    b) Qeyb hoostagaysa waax waxaa la abuuri karaa ama ay jiri kartaa oo keliya haddii qeybtu leedahay 10 shaqaale rayid ah, waxaana maamulaya madax-qeybeed kaas oo ka mid noqonaya heerka maamulka dhexe ee Wasaaradda.

    c) Waaxyaha, qeybaha ama unugyada shaqo ee la abuurayo waa in shaqooyinkoodu kala soocnaadaan oo laga ilaaliyo in ay qabtaan shaqo isku mid ah loona dhiibaa dad aqoon u leh arrimaha ay qaabilsan yihiin.

7. Unugyada hoostagi kara madax-qeybeed ee lagu xusay Faqradda 4[aad] ee Qodobkan waxaa loogu talagalay in lagu fududeeyo shaqada lana abuuro kooxo shaqo, waxaana soo-jeedintooda leh madax-qeybeedka ay khuseyso, waxaana oggolaanshaheeda leh agaasime waaxeedka ay khuseyso, isaga oo kala tashanaya agaasimaha guud ama xoghayaha joogtada ah.

8. Waax ama qeyb looma abuuri karo la-taliye heshiis shaqo kula jooga wasaaradda/hay'adda. Lataliyuhu waxa uu ku dhex shaqeynayaa qaab-dhismeedka rasmiga ah ee wasaaradda ama hay'adda, iyada oo heshiiskiisa lagu caddeynayo

waajibaadkiisa iyo waaxda, qeybta ama xafiiska uu la shaqaynayo ee ku leh korjoogteynta.

9. Qof aan ahayn shaqaale rayid ah looma magacaabi karo jagooyinka ama xilalka maamul ee wasaaradda/hay'adda sida agaasime guud, xoghaye joogto, maareeye guud, agaasime waaxeed, iyo madax-qeybeed, mana noqon karo sii-haye ama ku-sime waxna uma saxiixi karo wasaaradda ama hay'adda.

10. Qaab-dhismeedka Wasaaradda iyo wax-ka-beddelkiisa waxaa lagu ansixinayaa laguna soo saarayaa xeer ra'iisul-wasaare, ka dib marka uu dhagaysto soojeedinta wasiirka ay khuseyso lana soo buuxiyo shuruudaha ku xusan Qodobkaan.

11. Guud ahaan qaab-dhismeedka guud ee Madaxtooyada, Xafiiska Ra'iisulwasaaraha, hay'adaha kale ee dowladda iyo xafiisyada kaabayaasha Xukuumadda, waxaa loo raacayaa faqradaha Qodobkan iyo xeerka lagu dhisay.

## *QODOBKA 56[AAD]*
## *QORSHEYAASHA HAY'ADAHA DOWLADDA*

1. Wasaaradaha, hay'adaha iyo xafiisyada kaabayaasha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxa ay yeelanayaan qorshe istiraatiiji ah oo shan sanadle ah, kaas oo hagaya shaqada wasaaradda, hay'adda iyo xafiisyadaas, waxaana loo rogayaa qorsheyaal howleed ay ku shaqeeyaan waaxyaha wasaaradda, hay'adda iyo xafiisyadaas.

2. Marka la diyaarinayo qorshaha istiraatiijiga ah, waxaa la xeerinayaa baahiyaha muwaadiniinta Soomaaliyeed, shuruucda dalka, Qorshaha Qaranka iyo Barnaamijka Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.

3. Qorshaha istiraatiijiga ah waxaa lagala tashanayaa heerarka dowladda iyo dhinacyada kale ay khuseeyo oo ay ka mid yihiin ururada bulshada rayidka ah waxaana lagu dhaqangelinayaa xeer ra'iisul-wasaare, iyada oo lagu soo saarayo Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

4. Baahida shaqaale iyo midda miisaaniyadeed ee wasaaradda ama hay'adda waa in lagu jaangooyaa halbeegyada waxqabad ee qorshaha shan sannadlaha ah.

5. Waxa jiraysa Madasha Agaasimeyaasha Guud oo uu hoggaaminayo Xoghayaha Joogtada ee Xafiiska Ra'iisulwasaaraha, waana madal lagu xiriirinayo fulinta qorsheyaasha hay'adaha Dowladda Federaalka, si waafaqsan barnaamijka Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.

## CUTUBKA SIDDEEDAAD
## HANNAANKA ISTICMAALKA AWOODDA FULINEED

### *QODOBKA 57AAD*
### *AWOODDA SOO SAARISTA XEER-NIDAAMIYEYAASHA*

1. Xeer-nidaamiye kasta waxaa la marinayaa isla habraaca lagu diyaariyay sharciga uu dhaqangelinayo, iyada oo awoodda soo-saaristiisa loo isticmaalayo oo keliya inta uu sharcigu oggolyahay.

2. Marka Golaha Wasiiradu soo ansixiyaan xeer-nidaamiye, waxaa lagu dhaqangelinayaa xeer ra'iisul-wasaare si waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka, waxaana lagu soo saaraya Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

### *QODOBKA 58AAD*
### *DEKREETOOYINKA AMA XEERARKA MAAMUL*

1. Dekreetooyinka ama xeerarka maamul waxaa soo saari kara oo keliya Golaha Wasiirada iyo xubnahiisa, si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka.

2. Marka la soo saarayo dikreetooyin ama xeerar maamul, waxaa la xeerinayaa mabaadii'da Shareecada Islaamka, kala soocnaanta awoodaha laamaha dowladda, xeerarka dalka iyo xuquuqda aadanaha ee dastuuriga ah, iyada oo saameynta go'aanka lagu soo koobayo baahida taagan oo keliya.

3. Dikreetooyinka nidaaminaya arrimo ay u xilsaaranyihiin wax ka badan hal wasaarad, waxaa ka heshiinaya wasaaradaha ay khuseyso, waxaana lagu soo saarayaa Xeer Ra'iisul-wasaare.

### *QODOBKA 59AAD*
### *GELIDDA HESHIISYADA*

1. Wasaaradaha, hay'adaha iyo xafiisyada kaabeyaasha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxa ay u galayaan heshiisyada, si waafaqsan xeerarka dhaqangalka ah iyo habraacyada lagu qeexay Xeerka Ra'iisul-wasaaraha ee lambarkiisu yahay 125 soona baxay 06/04/2023.

2. Marka Golaha Wasiiradu ansixiyaan heshiisyada caalamiga ah ee sharcigu farayo, waxaa la horgaynayaa Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya si uu u ansixiyo.

## *QODOBKA 60AAD*
## *GO'AANNADA MAAMUL*

1. Go'aannada maamul ee wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee Dowladda waa in loo maraa habraacyo caaddil ah si waafaqsan shuruucda dalka, iyada oo la tixgelinayo xuquuqda iyo danaha muwaadiniinta Soomaaliyeed iyo dadka kale ee ku nool geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2. Saldhigga sharci ee loo cuskaday go'aanka maamul waa in lagu caddeeyaa isla go'aanka dhexdiisa, waxaana reebban in la soo saaro go'aanno aan laheyn tixraac sharci ama aan soo galeynin awoodaha sharci ee wasaaradda, hay'adda, ama xafiiska soo saaray go'aanka.

3. Go'aannada maamul waa in ay ahaadaan qoraal sababaysan waana in nuqul rasmi ah lagu kaydiyaa xusuus-dhowrka wasaaradda, hay'adda, ama xafiiska soo saaray go'aanka.

4. Go'aannada maamul waxaa cabasho looga qaadan karaa maxkamadda awoodda u leh si waafaqsan xeerarka dalka marka mid ka mid ah arrimahaan laga helo:

    a) Go'aanka maamul ee kama-dambaysta ah;
    b) Go'aan kasta oo lafdhabar u ah go'aanka maamul ee kama-dambeysta ah; ama
    c) Daahinta go'aanka marka go'aanka lagu soo saari waayo xilli maangal ah.

## CUTUBKA SAGAALAAD
## KAABEYAASHA XUKUUMADDA

### *QODOBKA 61AAD*
### *WADASHAQEYNTA XUKUUMADDA IYO KAABEYAASHEEDA*

1. Kaabeyaasha Xukuumadda waxaa soo gelaya dhammaan wakaaladaha, xafiisyada, iyo hay'adaha kale ee sharcigu u dhisay in ay laanta fulinta ku kaalmeeyaan xil-gudashadeeda.

2. Haddii hay'ad ama xafiis gaar ah oo ka mid ah kaabeyaasha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya uu qaabilsan yahay howl ama qeyb ka mid ah oo halkaan loogu xilsaaray wasaarad, waxaa mudnaanta leh hay'addaasi wasaaradduna waxa ay kula shaqeyneysaa si waafaqsan xeerka gaarka ah ee hay'addaasi lagu dhisay.

3. Xiriirka wadashaqaynta wasaaradaha iyo hay'adaha hoos tagaya waxaa loo raacayaa xeerarka lagu dhisay iyo xeerarka kale ee dalka, iyada oo Wasiirku uu mar kasta ku leeyahay korjoogtayn siyaasadeed si waafaqsan xeerarka dalka.

### *QODOBKA 62AAD*
### *WADASHAQEYNTA WASAARADAHA HEER FEDERAAL IYO HEER DOWLAD-GOBOLEED*

1. Awoodaha lagu xusay xeer-nidaamiyahan ee Wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee kaabeyaasha ah waxaa xaddidaya Dastuurka iyo Xeerarkooda gaarka ah;

2. Wasaaradaha heer federaal iyo heer dowlad-goleed waxaa ka dhexeeya xiriir wada-shaqeyn si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerarka kale ee Dalka, iyada oo Wasaarad kasta oo heer federaal ah xiriir wada shaqeyn la yeelaneyso dhiggeeda heer dowlad-goboleed.

### *QODOBKA 63AAD*
### *HEERARKA MADAXBANNAANIDA*

1. Heerarka madaxbannaanida hay'adaha waa mid fulineed, waxaana loo raacayaa sida loogu qeexay Dastuurka iyo Xeerarkooda gaarka ah, iyada oo magacaabista iyo xil-ka-qaadista madaxda iyo xubnaha hay'adahaasi loo marayo hannaanka sharci ee loo jideeyay.

2. Guddiyada iyo Xafiisyada madaxabannaan ee dastuuriga ah, waxaa lagu nidaaminayaaa mabaadii'da dastuuriga ah iyo qodobbada ku qeexan xeerarkooda gaarka ah.

## CUTUBKA TOBANAAD
## QODOBBO QUBANE AH

### *QODOBKA 64<sup>AAD</sup>*
### *DIB-U-EEGISTA IYO WAX-KA-BEDDELKA*

1. Xeer-nidaamiyahaan waxaa lagu sameyn karaa dib-u-eegis iyo wax-ka-beddel, hadba sida baahidu ay tahay, iyada oo la xeerinayo duruufaha shaqo ee soo kordha, faritaannada sharci.
2. Xeer-nidaamiyahan waxaa wax looga beddeli karaa ama dib-u-eegis loogu samayn karaa kadib soo jeedinta Ra'iisul-wasaaraha ama golaha xukuumadda, iyadoo la xeerinayo hadba baahida jirta.

### *QODOBKA 65AAD*
### *DHAQANGAL & BAABI'IN*

1. Xeer-nidaamiyahan waxa uu dhaqangalayaa marka Golaha Wasiiradu ay ansixiyaan, uuna Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ku soo saaro Xeer Ra'iisul-wasaare, waxaana lagu faafinayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Xeer-nidaamiyahan waxa uu baabi'inayaa xeer-nidaamiyeyaasha, xeerarka maamul, iyo dekreetooyinka ka hor imaanaya ee ku saabsan nidaaminta xafiisyada iyo xil-gudashada Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.